Maktabada telegramka @somalibooks

@somalibooks

Garba Duub

tech-shiil.blogspot.com/2019/06/garba-duub.html

Waxaa uu indhaha kala qaaday isaga oo la jiidayo labada garabna laba nin oo xooggani ka hayaan, faraha foodooda ama afka hore ee kabaha ay ku socodsiinayaan, wuxuu dareemay qoyaan indhaha korkiisa ka tis leh oo dhegdheg ah.
Siday u waldaaminayeen ayay ku tuureen dhulka intay haraati iyo laad la dhaceen ayay ka tageen, Guhaad ayaa indhaha oo isku dhegdhegan yihiin ayaa is dayey inuu kala qaado, balse xinjiraha dhiiga guntamay ayaa sida xabajada baararka u qabsaday ayaan suurtagal ahayn u inuu kala qaado.
Ma jirto xubin ama meel korkiisa ah oo aan danqanayn, waxaana loo jirdilay si naxariista ka fog, Guhaad xanuunka iyo kaarka korkiisa hayaa, maaha mid is doorinaya, mararka qaarkoodna marka aadan ogeyn cid kuu damqanaysa maba jiro xanuun ku qabta, maxaa yeelay naftu meel ay naxariis ka filayso ay catoow iyo cabasho ka muujisaa.
Guhaad meeshii lagu tuurey dhanna isagama dhaqaajin, muxuu iska dhaqaajiyaa maba awoodee, meeshay ku tureen ayuuba ku nas qabaa, haddiiba aysan jirin cid garaac iyo lafa tumid la dul joogta, isagoo sidiisii miyir daboolan ayaa wuxuu galay qarow iyo qandho isku darsan hurdo wadata.
Markay ka soo wareegtay 24 goorood(saacadood) ayaa waxaa uu maqlay sanqadh iyo dhawaq xooggan, ma awooddo inuu jaleeco ama eego cidda sanqadhaysa, siday u soo socdeen ayaa intey labada garab ka qabteen mar kale ay jiideen, meesha la jiidayaa waa meel mugdi badan oo albaabo biro ah iyo darbi dhexdooda waxaana la geeyey, qol kale oo miis iyo laba kursi yaallaan, dhexdana birtaxyo(Silsilad) uga xiran tahay meel sare ka soo laadlaada, waxaa qolka dhex taagan labadii nin iyo mid kale oo meesha joogay, ninkii kale ayaa faray labadii nin inay qaadaan Guhaad oo ay ku xiraan birtaxyada , waxaana laga soo laadlaadiyey birtaxyadii meesha ku xirnaa lugaha dhulkaa looga qaaday gacmihiisana korbaa loo xirey.
Markaan qolku waa iftiin oo nal baa ka daaran,waxaa hortiisa ka muuqda laba nin xooggan dharkii ciidankana gashan iyo nin kale oo fool adag waxay saddexdooduba gashan yihiin dharka ciidanka, balse dharka ay gashan yihiin maaha mid uu hore u arkay ee waa dhar ku cusub, inkastoo xaalkiisu yahay daaladhac iyo dikaan, haddana milicsiga indhihiisa ay dabooleen xinjiraha dhiiga guntamay ee ku dhegay baararka iyo sunniyaha ayaa u diidaya inuu si huban oo qumaati ah wax walba u arko.
Foolkiisa waxaad mooda iyo madaxa dhul bannaan oo buuralay noqday waayo meel walba iyada oo kuusan ayay af dilaacsan oo dhiig ka hooray leedahay, meelaha qaarna dhiig madoobaada oo ku qalalay ayaa ka muuqda, muuqaal argagax leh oo aad dareemayso in aysan falin dad naxariis iyo dadnimo ku dambayso.
Waxaa isa soo hortaagay isagoo meeshii laga lulay ka laadlaada, ninkii xoogga weynaa oo garbihiisa gaashaamo iyo xiddiguhu is dul saarnaayeen, wuxuuna si jeesjees iyo isla weyni ah ugu yiri: “ Haddaad doonayso in lagaa daayo dilka iyo garaaca, dantaadu waxay ku jirtaa

inaad sheegto waxaan kaa rabno iyo waxaan ku weydiino".
Guhaad oo arka inuu gacan col iyo ma naxe ku jiro, hase yeeshee aan garan goobta iyo halka uu haatan joogo ayaa goroda iska laadlaadiyey, maxaa yeelay wax walba uu yidhaahdo waa ogyahay inaysan cidna ka dhegaysanayn ileyn nin meeli u caddahay meeli ka madoowe, markii saddexdii maalmood ee hore wuxuu joogay meel ka duwan halkan oo uu yaqaan, dadka haystay ee garaacayey waxna weydiinayeyna waxay ahaayeen raggii ay ciidanka wada ahaayeen xerada qudhana ka wada hawl geli jireen.
Haddase wuxuu joogaa meel uusan weligiis arag, waxaana loo keenay dad uusan garanayn, waxaa la yidhi nin raggi geeridiisa waa ogyahaye, Guhaad ogaa inuu ku jiro gacan adag oo aan sina looga baxsan karin, balse muxuu sheegaa maba oga waxaa lagu haystee.
Guhaad ayaa yiri: " Qofka wax og baa wax sheega,anigase ilaa hadda ma garanayo waxaa lay weydiinayo, mana garanayo waxaa aan ku galabsaday dhibkan iyo kadeedkaan miyeydaan soomaali ahayn miyaananse ahayn nin ciidan oo dalkiisa iyo dadkiisa heegan u ahaa maxaan galabsaday?".
Arrinkaasi ma ahayn mid uu yeelay taliye Duubane ee wuxuu faray labadii askari inay garaacaan oo ay ka soo saaraan xogta uu hayo ilaa uu ka dhimanayo, Guhaad warkaas waa maqlayaan dhegihiisu, xaalkiisuna waa "Nin laga awood roonyahay laga arrin weyn" Halkii bay garaac iyo jirdil ku bilaabeen ilaa uu mar kale ka miyir daboolmay afka iyo sankana dhiig ka keenay.
Sidii oo kale ayay u jiideen waxaana la celiyey qolkii mugdiga ahaa ee laga soo saaray, iyadoo sida jawaan la rarayo dhulka gawaanka adag ah loogu tuurey, jirkiisa meeli uma noola, faraha qaarkoodna waa jaban yihiin sidii looga maroojinayey oo ma dhaqaajin karo, korka kalena meel meel dhaanta ma leh.
Ifka eedaad ku mudo iyo urugo waa tanoo kale, wuxuu nabdiga iska weydiinayaa, tolow maxaan galabsaday oo layga goynayaa? Wuxuu yaalla dhulka gawaanka ah sida didibka u adag wax feedhihiisa burbursan iyo oogadiisa dildilaacsan ka xigaana ma jiraan.
Waxaa goor uusan garanayn habeen iyo maalin mid ay tahay lagu ag soo tuurey, weel godan oo waxyar oo qamadi ahi ku jiraan iyo koob biyo ah, markuu in cabbaar ah joogay ayaa intuu nafta dhibay oo uu gurguurtey ileyn calaacalaha waxba kuma qabsan karee ayuu labada curcur biyihii ku qabsaday, biyaha ayaaba dhibaya dhuuntiisa waayo mar hore ayaa ugu dambeysay, dani waa seeto waxay murti kalena tidhaahda " Nin la tumay talo jirtaa" baahida iyo oonka inuu iska bi'iyaa waa lama huraan, wuxuu dhigtay beerka sida ma yeedhaanka ayuuna weelkii afka ula galay, maxaa yeelay intuu salka dhigto si haaneedsan waxba uma cuni karo, wuxuu raftaba biyihii ayuu cabay cuntana awood uu iyo af uu ku ruugo maba laha.
Markii uu biyihii yaraa dhuunta ka dejiyey ee intii eebbe u calfay ka cabay ayuu daalkii la diiday, Guhaad ma oga habeen iyo maalin, dharaar iyo galab mid ay tahay waayo meeshu uu ku jiraa waa qol leh hal irid oo bir weyn ah meel yarna xitaa uusan ilays ka soo gelayn oo isha haddii farta lagaa gelinayo aadan arkayn, waxaa ugu dhexyaal meel salka la dhigo oo loogu talo galay saxarada oo keliya, balse ma oga xitaa meeshaasi meel ay ka xigto.
Guhaad markuu sidaa ugu jirey ammin dhawr maalmood ah, waxba iska doorin qaabkii

@somalibooks

loola dhaqmayey oo maalin walba iyo habeen walba inta la garaaco lagu soo tuurayey qolkii madooba, isaguna uusan haba yaraatee wax xog ah sheegin ee ma ogi iyo maxaa layga rabaa uu ku dhammeystay.

Haddase wuu is dhiibay oo wuxuu isu diyaariyey geeri, xanuunka iyo werwerka joogta ah ee haya uu ka dhigay mid dhabaandhawsan oo aan wax talo ah haynin keeninina karin,.

Guhaad oo quustu iridka u soo garaacday qabatimayna dilka iyo iyo hatigaada lagu hayo ayaa maalintii dambe laga soo saaray qolkii uu ku jiray, waxaana la geliyey mid ka sii cidhiidhi badan oo aan dhan loo nuuxsadaana jirin, inta laga saaray dharkii oo dhan oo laga dhigay muddug ayaa biyo qaboowna dusha iyo dhulkaba loogu shubay, salka ma dhigi karo inuu kadaloobsado maahine oo dhulka oo dhan biyaa buuxa, dhana uma jeesan karo dhinaca albaabka maahine labada dhinac jilbahaa qabsanaya,waa meel gumaystihii dalka ka tegay iyo saancaddaalihii u samaystay dadkii gobonnimo doonka ahaa inuu ku dhibaateeyo kuna xakaariyo.

Waxay sidaa ahaataba oo maalinba kadeed iyo dhibaato la marsiiyo Guhaad,markii in ammin ah ka badan saddex toddobaad lagu hayey kadeed iyo xakaar aan kala joogsi lahayn, ayaa maalintii dambe ayaa laga soo saaray qolalkii mugdiga ahaa, waxaana la keenay qol uu ku jiro oday garweyn oo diif badan iyo dacdaro ka muuqato, oo aan kii hore wax dhaamin, haddase waxaa la siiyey, buste uu dhaxanta ka huwado iyo xalaaf yar oo uu dhinaca dhigo, haba iska injir iyo kutaan badnaadee, waxa kale uu la keenay qol daaqad yar oo saddex dalool leh oo halkaas iftiinka iyo dhawaqa bannaanka laga maqlayo.

Guhaad markan dil iyo garaac midna waxba uma arko waa hayimay, waana la qabatimay, waayo? Maaha arrin uu wax ka doorin karo ee waa dhibaato qabsatay noloshiisana la soo deristay, sidaa awgeed meel uu ciirsado iyo meel uu u cararaa midna ma jiro.

Odayga loo keenay waa nin da' ahaan markaas lixdan jirka madaxa la galay, labadooda midna midka kale uma bogin ee isha ayuu ka dhawrayaa, wax wada hadal ahina ma dhexmarin.

Odayga meesha loogu keenay waa Oday Dirir wuxuu ahaa nin aqoonyahan ku xeeldheer dhaqaalaha, wuxuu u shaqeynayey ammin dheer dowladda iyo laamaheeda kala duwan ee dhaqaalaha, waxaase lagu oogey inuu xatooyo xoole dadweyne galay, sidaas ayuuna ku muteystay xadhigan iyo garbaduubkan.

Markuu Dirir arkay wiilka yaree ee loo soo geliyey, waxaa galay dareen waxa uuna u qaatay in malas iyo dabin loo dhigayo oo mid ka mid ah askartoodi ay usoo xareeyeen intay soo yara baha buheeyeen lana rabo in war ka qaado oo isaga dhigo nin xidhan oo isaga oo kale ah, juuq iyo jaaq uma odhane intuu ka sakidey ayuu is duuduubay.

Guhaadna maaha nin war hayee, daal iyo diif haysay awgeed ayuu la dhacay, oo la gataati dhacay, mararka qaarkood hurdadaaba dhaymo u ah oo xanuunka iyo kaarka naftu dareento markay soo jeedo.

Labadoodi oo aan midna eray iyo arrin weydiin ka kale ayaa waagi u baryey, waxaa loo keenay nin walba xabbad rooti ah iyo koob shaah oo madoow, markan waxaa ileys waa lays arkaa midba meeshiisa ayuu la fadhiistay, Dirir oo si feejigan isha ugu xaday ayaa arkay ninka nabarada korkiisa ka muuqda, iyo dhaawaca jirkiisa ku yaal ee meel walba dhiiga

@somalibooks

@somalibooks

guntamay iyo gunaadka madoow ee jugtu ka sii muuqato, iyadoo meelaha qaar dheecaan cad ku jiro aan ciddina dhayin, Dirir ayaa ayaa garowsadey inuusan ahayn sidii u maleynayey, balse waxba kuma darsan.

Dhibkaad martoba hortaa baa la maraye, inta Guhaad lagu dhigay iyo ka daranba waa soo maray Dirir, waxaa u dheerayd, koronto iyo weliba in xiniinyaha bira looga qabto, taasoo dhaawac iyo argagax nafeed u gaysatay.

Dirir waa nin waayo arag ah, kana da' weyn kana xog ogaalsan Guhaad, oo wuu dareensan yahay meesha laga galay iyo cidda halkan keensatay iyadoon ciddina u sheegin waa tii la yidhi " Kor waayeel waa wada indho, amase ay ahayd murtidii kale Libaax nin ganayna og, nin galladayna og.

Dirir ayaa maalintii dambe u adkaysan waayey ninkan la xidhan oo habeenkii oo dhana qarwaya maalintii oo dhana, faruuryo qaniinsan ee hundhura, wuxuu arkay werwerka iyo walaaca ka muuqda wiilka dhallinyarada ah, waxaa uuna isku dayey inuu la sheekaysto oo wax weydiiyo, kana wareysto xaalkiisa dareen iyo xanuunka haya.

Balse, Guhaad laftiisu kalsooni ma jirto oo waxaa dad meesha jooga wuxuu u arkaa inay isku mid yihiin, kanna yahay mid xog iyo xuuraansi ka raadinaya, nabad iyo waa fiicanahay ayuu warka ugu soo koobay.

Dirir ayaa isku dayey inuu dooc doociyo oo bal hogga tusmeeyo nolosha adduun iyo is rogrogeedana uga faalloodo, iskuna dayey isagoo si dareen diqadnimo ah u baadhaya xogtiisa iyo waxaa uu u rumeysan la'yahay arrinkan la soo dersan uguna gegsan la'yahay ee shidaya.

Uma suurtagalin arrinkaasi Dirir, balse, dareen in ninkan meel fog laga haysto, Guhaad waxaa isu raacay laba ciil oo kala ah, sida uusan u ogayn waxaa uu geystay iyo tuhunka beenta ah ee la geliyey naftiisa, haddana dhibaatada la marsiiyo isagoo isu arkaa nin maamuuskiisa lagu ciyaaray, boholyoowga kalgacal iyo xiise ee hayaana waa mid maankiisa sida hirarka badda isu laba rogaya.

Dirir kama daalin inuu marba dhan kaga yimaad si ay isula jaanqaadaan isuguna maaweeliyaan nolosha adag ee ay ku jiraan is af garadna u dhexmaro, balse, arrinkaasi ma noqon mid suurtagal ah.Guhaad oo aan warkiisu ku socon isna leh wuxuu rabaa inuu kaa hadalsiiyo ayaa intuu eegmo kulul ku eego markuu wax weydiiyaba ka aamusay. Guhaad waa askari tababar adag soo maray oo qaatay hab kasta iyo hannaan kasta oo looga feejignaado dhagarta iyo shirqoolada dahsoon, inkastoo uu haddaba gacan ku jiro, balse waa meel uusan ka filanayn meesha laga soo galay.

Guhaad iyo Dirir waxay is hor fadhiyaanba, habeenkii dambe ayaa waxaa u yimid taliye Duubane goor ay tahay saq dhexe, waxaana marba lala baxay midkood, waxaa la hormariyey Oday Dirir ayaa lala baxay, kaddibna waxaa laga wareystay inuu wax u sheegay kan kale iyo in kale Guhaad, iyadoo loo sheegay in uu heli doono maalin walba inuu bannaanka yimaad, dadkiisuna soo booqan doonaan, haddii uu ka kaalmeeyo arrimaha Guhaad.

Dirir wuxuu yidhi: Ma nin idinka mid ah ayaad doonaysaan intaan qol ila gelisaan inaad ka dhigtaan nin ila xidhan oo dhib qaba sidayda oo kale, lamana hadlin lamana hadli doono,

teeda kale hadduu dhibane yahay oo ay dhacdoba inuu xogtiisa igu qarsado idiinma sheegeen, waa loo caga jugleeyey tukhaantukhin iyo hadba dhinac u tuur kaddib waxaa lagu soo celiyey qolkii.

Markii dambena waxaa lala booday Guhaad, markii sidii horeba joogtada u ahayd arrimihiisa wax laga weydiiyey, ayaa haddana la weydiiyey Dirir inuu wax u sheegay iyo in kale. Wuxuu yidhi, waxna iima sheegin mana aqaan magaciisa iyo qofka uu yahay, keliya waxaan maqlaa codkiisa markuu tukanayo iyo markuu quraanka aqrisanayo, war iska daaye salaadda ninkaad i weydiinaysaa iskuma darsano.

Mid weliba isagoo la yaaban kan kale waxaa laga rabo ayuu meeshiisi isku nabay, waxna isma aysan weydiin.

Dirir wuxuu haystaa kitaab quraan ah, Dirir iyo Guhaad waxay ka siman yihiin, ma jirto cid xigaal iyo gacal ah oo soo booqata ama ka war haysa, kaaga darane labadooda midkoodna ma garanayo meesha ay joogaan, afarta dhinac ee carra edeg.

Sidaasoo kale waxaa werwer iyo walaahoow ku nool oo maalin walba taagan goobihii ay ka hawlgelayeen iyo xarumahi ugu war dambaysay, qoysaskoodi iyo dadkii xigaalkii ahaa ee u dhawaa labadooda oo aan ogayn nolol iyo geeri meel ay ku sugan yihiin, meel walbana baadigoobkooda ku jira, lana socodsiiyey maqnaanshiyahooda ciidanka nabadgelyada iyo saldhigyada.

Ciidanka nabadgelyadu baafin iyo dabagal ayay sameeyaan, markase ay tagaan xarumahay ka hawlgeli jireen waxaa loo sheegaa inay tahay xog qarsoodi ah.Halkaas hadduu xaalku joogana waa inay gacmaha dib uga laabtaan weliba xitaa lama wadaagi karaan xogta ay heleen dadkii soo weydiiyey, inay been iyo war aan jirin waa lagu maqanyahay iyo waa ku daba jirnaa yidhaahdaan maahine.

Waxaa keliya og meesha ay joogaan iyo halka la geeyey, waxaa og keliya raggii shirqoolay iyo ciidanka nabadsugida mana jiro qof kale oo ka war haya ama heli karaba xogtooda.

Dirir quraanka ayuu ileyska arooryo ku aqristaa, isagoon weyso iyo biyo midna haysana waa tukadaa, arrintaas ayaa aad usoo jiidatay Guhaad, waxa uuna bilaabay inuu isaguna tukado oo eebbe dhankiisa ka baryo.

Guhaad waxaa uu la dhacay dhaqanka wanaagsan iyo eebbe tuuga goor walba uu ku jiro Dirir sida uu u talo saartay weynihii abuurtay iyo inuu yeelay arrinka qabsaday adkaysi iyo dulqaadna ka muuqdo, halka uu isagu isla hadal iyo u qaadan waa ku tahay, hilowna uu hayo qoyskiisii, sida; hooyadii iyo labadii gabdhood ay walaalaha ahaayeen iyo xaaskiisi aroosada ahayd.

Wuxuu aad uga werweraa side noqon doontaa noloshoodu, yaa garab iyo gaahsaan u ah, yaa kaalmeyn doona, maxayse xaalkoodu ku sugan yahay? Guhaad habeen oo dhan wuxuu dhex dabaashaa riyo isaga oo gacalisadiisa ubax la jooga oo ay si habsami leh ugu damaashaadayaan nolol aan dareen dhiilo lahayn iyo degani.

Wuxuu aad uga werweraa side noqon doontaa noloshoodu, yaa garab iyo gaashaan u ah, yaa kaalmeyn doona, maxayse xaalkoodu ku sugan yahay? Guhaad habeen oo dhan wuxuu dhex dabaashaa riyo isaga oo gacalisadiisa ubax la jooga oo ay si habsami leh ugu damaashaadayaan nolol aan dareen dhiilo lahayn iyo degani.

@somalibooks

@somalibooks

Marka uu soo jeedanaya wuxuu xasuustaa maalmihii wanaagsanaa ee noloshiisa,Guhaad marnaba waxaan maskaxdiisa ka go'in hayaankii dheeraa ee kalgacalka iyo jacaylka ahaa ee ay soo mareen isaga iyo gacalisadiisa Ubax.

Guhaad wuxuu ka dhashay qoys ka kooban 5 qof aabbihii Samatar Digaale iyo Hooyadii Dhudi Sulub, laba gabdhood oo uu u dhaxeeyey, Qadan oo ka weynayd iyo Quman oo ka yarayd, qoyskan ayaa ahaa qoys ku nool badhaadhe iyo nolol barkhadeed, ka hor intii aannu dhiman aabbahood oo ku geeriyooday dagaalkii dhexmaray Soomaaliya iyo Itoobiya.

Samatar wuxuu ahaa nin xilkas ah oo dal iyo dad jecel, waana tan keentay inuu naftiisa dalka u huro, ooridii uu jeclaa iyo ubadkiisa ka hormariyo, gobonnimada iyo jiritaanka qarankiisa oo uu ka jiro col iyo shisheeye hungureeya dadkiisana gumeeya.

Waxay ahaayeen Samatar iyo Dhudi aabbe iyo hooyo dhaqanka soomaaliyeed u ah astaan oo lagu soo hirto, tol, gacal iyo xigaalba mahadiyeen, ubadkooduna wuxuu ahaa mid anshaxa iyo habdhaqanka wanaagsan lagu barbaariyey oo dal iyo dad jacayl laabtooda buuxiyey. Qoys soomaaliyeed oo ka maamuus iyo milge wanaagsani ma jirin, inkastoo aysan hayntoodu badnayd, waxay deganaayeen guri jiingad ah ama sandaqad oo saddex qol ah iyo dhul ay leeyihiin oo uu Aabbe Samatar ka iibiyey geelii uu aabbihiis Digaale dhaxalka uga helay.

Guhaad wuxuu ku barbaaray dad is jecel oo deriska iyo xigaalku yahay ul iyo diir, kii buka la booqdo, kii baahana la garab qabto, kii goblana loo gargaaro, kii dhib qabana loo dhimriyo.Aabbihii Samatar wuxuu ku beeray dal jacayl iyo dad jacayl isagoo shanta soomaaliyeed u sheegay inay yihiin dad ab iyo fir qudha ah oo aan kala mudnayn kalana maamuus sarreyn.

Isaga oo dhigta dugsiga dhexe ayuu aabbihiis geeriyooday, balse, waxaa markay agoomoobeen gacan qabtay dadkii xigaalka ahaa iyo deriskooda oo hooyo Dhudi ka ilaaliyey inay dareento agoonimo iyo kaalintii odayga reerku ka baxay.

Waxa sidoo kale in badan ka war hayey ciidamadii uu ka tirsanaa Oday Samatar oo xitaa gunnadooda iyo gasiinkooda la qaybsanayey, raggaas waxaa ka mid ahaa, Caddaawe, Guuleed dheere, Calas gaab iyo rag kale.Inkastoo aysan wax badan ku biirin dowladda iyo waaxda ku hawsha leh agoonta ciidamada, haddana raggaas iyo kuwa kale ayaa u gurmaday waxaana ka soo geli jirey saddex biloodba wax aan badnayn balse kaalmo ugu filan.

Hooyo Dhudi waxay isu taagtay siday ubadkeeda baahi uga dhawri lahayd, nolol wanaagsan oo rayn rayn iyo riyaaq lehna ay ugu noolaan lahaayeen.

Waxa ay deris wadaag ahaayeen oo in badan wada deganaayeen reer Caraale Suudi oo ahaa nin ganacsade ah, inkastoo uusan lahayn ganacsi buuran haddana waxay ahaayeen qoys nolosha meel dhexe ka jooga oo gaadiid gobollada u kala goosha iyo dhawr meelood oo ganacsi suuqa ku leh.

Labada qoys ayaan la kala aqoon ubadkooda oo isku badhxanaa, waxayna ahaayeen dhib iyo dheef wadaag noloshu mataanaysay oo cid walba isaga dhaw.

Qoyskani waa qoyska ay ka dhalatay Ubax Caraale, inkastoo uu ka weynaa ilaa laba gu' iyo dheeraad Guhaad gabadhooda ugu weyn ee Ubax, haddana isku ayni uun bay ahaayeen

oo waxba isma dhaamin, Oday Caraale ayaa ka codsaday Guhaad inuu ka caawiyo casharada dugsiga maxaa yeelay isaga ayaa laba ayni ka sarreeyey.
Ubax iyo Guhaad, waxay ahaayeen far iyo fargashi oo dugsigana waa wada aadaan, waana ka wada yimaadaan, haddii meel loo dirana waa is raacaan, waxayna ahaayeen mataano dhan walba isku dareen ka noqday, midna ma jeclayn midka kale inuu ka maqnaado, waa is tebi jireen waana isu hiloobi jireen haddii mid midka kale ka dheeraado ama ammin uusan arag.
Waxay sidaa iyagoo sidaa isku ah isla dhiganayeen dugsigii sare, balse, weligood ma dhicin inay sheeko wadaag noqdaan oo si gaar ah iyo arrimo aayatiin ka wada hadlaan, sidoo kalena ma dhicin in midkoodna yeesho lammaane gacal iyo qof ay haasaawe wadaagaan.
Haatan waa la weynaaday oo labadooduba waa gaadheen heerkii dareenka ragganimo iyo dumarnimo bilaabmayey,mid waxaa u dhammeystirmay awoodi labnimada iyo dhedignimada,inkastoo labaca iyo quruxda Ubax aad moodaysaba inay tahay mid da'deeda ka weyn.
Ubax waxay la soo kacday qurux iyo filsamaan ay asaageed baro dheerayd, gabadh heego ah oo dherer, hubqaad, heense iyo heemaalba eebbe u dhammeystiray ayay noqotey, dhammaan barbaarta iyo dhallinta deegaankuna isha ku wada hayaan oo nin weliba maagan yahay inuu maalin la joogsado lana jaanqaado, sheeko iyo shukaansina la wadaago.
Balse waxaa looga wada waabtaa waa Guhaad oo aysan kala qoob qaadin, tuhun iyo guux badani waa jiraa oo dadka kale ah, balse iyaga iyo labadooda qoys midkoodna dareenkaasi kuma jiro, haddii ay la yimaadaan, waalidkoodu waa mid u diyaar ah inay agaasimaan oo ay isku daraan.
Habeen habeennada ka mid ah, ayaa wiil dhallinyaro ahaa oo dugsiga sare la dhigan jirey magaciisa la yidhaahdo Gallad wuxuu ugu yimid xaafadda, kaddibna wuxuu weydiiyey inuu ku kaalmeeyo sidii uu ula kulmi lahaa Ubax, arrintani waa ku adkaatay Guhaad, waayo ma jirto qaab uu uga diido oo isaga iyo Ubax waxba kama dhaxeeyaan, mana jirto qaab ku oggolaado maxaa yeelay haddana dareenkiisu kuma sama inuu nin kale ku ag arko.
Iyadoo xaalku sidaa yahay wiilkiina uu ka xishooday, oo si uu ugu dayriyo aanu garanayn, ayuu ku yidhi sug, foolxumo ayay la noqotey inuu tago gabadha gurigooda oo weliba yidhaahdo nin ayaa ku rabo! Haddaba isagoo wiilkana inuu xumeeyo aanan rabin, isaguna uu dhulka isku jiido, ayuu farsamo kale adeegsaday, waxa uuna u yeedhay wiil yar oo kurey ah oo deriska uun ka mid ahaa xaafadda wax ka deganaa kuna yidhi, waxaad tagtaa guriga reer Caraale, dadka waaweyne iska eeg, kaddib gabadha joogta ee Ubax iyadoon cid kale ku maqlin u sheeg in bannaanka loo joogo. Wiilkii yaraa ee kureyga ahaa wuxuu ahaa nin fiice wuxuu sameeyey sidii uu faray waxa uuna u tegay Ubax farriintiina gaadhsiiyey.
Iyadoo xaalku sidaa yahay wiilkiina uu ka xishooday, oo si uu ugu dayriyo aanu garanayn, ayuu ku yidhi sug, foolxumo ayay la noqotey inuu tago gabadha gurigooda oo weliba yidhaahdo nin ayaa ku rabo! Haddaba isagoo wiilkana inuu xumeeyo aanan rabin, isaguna uu dhulka isku jiido, ayuu farsamo kale adeegsaday, waxa uuna u yeedhay wiil yar oo kurey ah oo deriska uun ka mid ahaa xaafadda wax ka deganaa kuna yidhi, waxaad tagtaa guriga reer Caraale, dadka waaweyne iska eeg, kaddib gabadha joogta ee Ubax iyadoon cid kale ku

@somalibooks

@somalibooks

maqlin u sheeg in bannaanka loo joogo. Wiilkii yaraa ee kureyga ahaa wuxuu ahaa nin fiice wuxuu sameeyey sidii uu faray waxa uuna u tegay Ubax farriintiina gaadhsiiyey.
Ammin yar oo kooban dabadeed waxaa u timid Ubax markay dhankoodii soo aaday ayay aragtay Guhaad iyo wiil kale ayaa la jooga, way na bariidisay, iyadoo dareen ku jiro lana yaabay arrinka caawa Galladd xaafaddooda keenay.
Waa ma jirin xidhiidh gaar ah oo kala dhaxeeyey Guhaad iyadana daaba warkeed, waxay ahaayeen dad dugsiga keliya ku arka, dushaasna iska yaqaaneen, Ubax ayaa ileyn waa dumare oo xeeshooda lama yaraystee waxay bilowday hadal ilaaq ah iyadoo wax gooli baadhaysa ayay tidhi: Waryaa Guhaad ma haddaad keentay inaad qolqolka iyo duda intaad isa soo taagto wiil yar iisoo dirto, sawdigii weligaaba guriga iigu iman jiray?
Gallad oo dhegihiisa wax ku maqlaya ayaa yaabay marna Guhaad eegay marna Ubax, Guhaad baa arkay ismaandhaafka meesha ka dhashay kaddibna si degan baan ugu halcelshay : Is deji aniga maaha qofka ku sugayey ee waa wiilkan oo dusgsiga inala dhigta aniguna waxaan keliya ku kaalmeeyey qaabkaad isu arki lahaydeen, ee ma gef baan falay mise xil i saarnaa baan gurey?
Intaanu Gallad hadlin ayay tidhi: Haa ma sidaasa! Aniguna waxaan is idhi isagaa ku yeedhaya ee tolow maxaa cusub? haddana intey dhinaca Gallad usoo jeesatay ayay tidhi soo dhawoow walaal”
Intaa markay tidhi ayuu Guhaad ka hinqaday una holaday inaan dhaqaaqo si uu gayaankan is doonaya u siiyo kansho ay ku wada hadlaan.
Balse Ubax ayaa si kalsooni ah intay gacanta u qabtay tidhi : Joog xagaad u ordaysaa ma dad aan is aqoon intaad isu keentaad isaga dhex baxaysaa waa ku side wiiloow?
Gallad oo arrinta meesha ka dhacaysa yara dhibsaday arkayna in arrintu calowsan tahay, waxbana ka soo naasa caddeyn, haddii halkaas loo sii dhaafona buyuur iyo looma fadhiyin ku dhici doonto, horena lagu yidhi gabadhaasi waa alkumantahay oo nin baa caleema saartaye haysku daalin , ayaa inta uu ka sare joogsaday kaabad yaroo ay fadhiyeen markii horr joogsaday oo garabka ka qabtay Guhaad , wuxu si degan ugu yidhi: “ War Guhaadoow waxaan dhexda ka galay hawl iga horreysay, adna waxba iima aadan sheegine, raali iga noqda, adigana maaha qofka baxaya ee aniga ayaa sii soconaya ee nabadeey”
Ubax oo dhoola caddeynaysa ayaa hadal aysan dhegtiisu jeclaysan ka daba tuurtay oo tidhi “ Waxgarad baad tahay walaal”
Gallad oo isna dareemay sida xaalku yahay ayaa hadalkii Ubax ugu warceliyey isagoon wax xumaan ahi ka muuqan “Kor waayeel waa wada indhee, raali ha layga noqdo haddaan lammaane is jecel kala dhex galay”
Gallad wuxuu hadalkii Ubax kala dhex baxay inaan haasaawe wadaag yihiin Guhaad iyo Ubax hore tuhunku waa ugu jiray, markanse si dhab u rumaystay,ayaa hore uga yara dhaqaaqay, kaddibna waxaa ka daba tegay Guhaad si uu wax uga dhaadhiciyo, balse Gallad isma dhibine wuxuu ku yidhi: Gob ayaad tahay intaan kaa mudnaana waad ii fashay dhibna ma jiree gabadha haka tegin, waxaad tahay nin cawo iyo ayaan badane.
Guhaad wuu ogyahay in aan isaga iyo Ubax wax dhaafsiisan walaalnimo iyo widaaynimo ka dhaxaynin, yaase u sheegaya Gallad!

@somalibooks

Guhaad dareen in laysku ajarmay, Gallad isla markiiba isaga oo aan weedh kale sugin ayuu baxay, Guhaad isaga oo la yaaban is maandhaafka meesha ka dhacay ayuu tooyday: Ubaxeey maxaad wiilka sidaa ugu gashay oo aadan ammin yarna u siin una weydiin wuxuu u yimid?

Ubaxna inta dhoolacadeyn iyo qosol suura leh dhag ka siiyey ayay tidhi: " Alla yaan gujiyaa oo gacal iigu dhaw! War heedha ama sida wiilkaas ayaa dantaada u dhaqaaq ama meelaha dhukus waa fulay iyo alabkiise!

Waana ka dhaqaaqday iyadoo weliba suuroonaysa, hadalka dambe ee Ubax ku sii tuurtey ayaa ku noqday fallaadh Guhaad gilgishay, mana uusan helin ammin aan kaga warceliyo. Habeenkaas oo dhan waxaa kashiisa dhex miranayey dhacdadii isaga iyo Ubax dhexmartay iyo falcelinadii ka dhashay, wuxuu is weydiinayey, ma kaftanbaa oo adigey ku yool baadhaysaa in rabitaan kugu jiro, mise waa ka dhab oo waxay ula jeeda soo badheedh oo dantaada ka hadal?

Habeenkaas oo dhan tallan iyo baxaadeg ayuu ku jiray isaga oo aan go'aan helina waa iska gataati dhacay. Waagii markuu baryey ee uu rabay inuu aado dugsigii ayuu soo maray sidii joogtada ahayd Ubax gurigooda, balse waxa iyaguna soo ka soo hormaray, Habboon iyo Hoodoo oo mataano ahaa, Ubaxna ahaa labadeeda garab ee aysan kala hadhin.

Guhaad waxaa uu nabdiga iska lahaa, bal kaftankii xalay afkeeda ka hubso waxay uga dan lahayd, iskana sii weydii si dul xaadis ah, ileyn reer magaalku kaftan bay arrinkooda ku dhammeystaane, haatanse suuragal maahoo, waa lala socdaa, isaga inuu gabdhaha agtooda ku hadla iska daaye, in meel qof ku nuuxsanayo arrimo qaabkaas ah uu ku sheego waa ku geeri oo kale.

Maanta Guhaad maaha ninkii kaftanka iyo sheekada badnaa, weydiinta iyo warcelinta badnaa dhinaca dugsiga, dhabbanahays iyo waxaa u billwday baadigoobka qaabkuu uga war keeni lahaa dhacdadii xalay.

Guhaad wuu is ogyahay in uusan oggoleyn Ubax wiil kale ku arko iyadoo la haasaaweysa, haddana ma oga waxa keenay inuu arrintaas dhibsado oo ay xanuun ku noqoto, dareen uusan ogeyn ayaa laabtiisa dhex mirayana, Eebboow nimaan wax ogeyn ha shideyn!

Markii laga soo baxay dugsiga ayay isa soo raacay markan waa labadooda oo keliya, hadba wuxuu meel isku qaado oo casharadii iyo arrimihii barayaasha ka sheekeeyo, hadba wuxuu qof kale iyo hawlihiisa isku taaro, markii dambe ayuu intuu is galaalay yidhi: Horta waxaan ku weydiiyey xalay wiilka haddaad ballamisay, maxaad sidaa ugu gashay ileyn qof weyn ma tihid, miyaa ragga lagu ciyaara?

Ubax oo og halka uu u socdo iyo ujeedkiisa ayaa tidhi: Weger iyo ka waaweyn, oo sideed ku oggaatay in aan balamiyey oo aannu wax isla meel dhignay ma isagaa kuugu sheekeeyey sidaa?

Guhaad lama dhicin weydiintan dambe waxaana ku baahay arrin uusan filayn isaga oo wiilkiina badbaadinaya, isaguna is muujinaya ayuu yidhi: Sidee baan qof aanan la ballamin waxna naga dhaxeyn, intaan xaafaddooda aado aan u odhanayaa halaygu waco?

Ubax oo afka maroojinaysa isna moogeysiinaysaa tidhi: Ragga uun baa sidaase ka suuroowdaa ee maaha dad oodhan, haddaan la ballamona waa soo dhaweyn lahaa, waana

@somalibooks

la hadli lahaa ee waxa aan uga gaabsaday ayaa ahayd inaan aqoon iyo arrin midna naga dhaxayn.
Guhaad oo halkaas wax uga biniixeen ayaa intuu is jooxaariyey yidhi: Wax badan ayaan maqlay oo aqriyey, inay dumarku waxay falaan is diidsiiyaan, waxay doonayaana qariyaan, maantana waa adiga kan ila hortaagan, maxaase kuu diidaya inaad sidii laba qof oo widaay ah wixii jira ii sheegto, ileyn kaagama xumiye.
Ubax oo aan la dhicin hadalkan ayaa tidhi: Haddaan is diidsiinayo, haddaba ciddi igama hortaagne, walaalow caga dhigo.
Guhaad ma hakane wuxuu yidhi: Xalay waxaad i tidhi sida wiilkaas ayaa badheedhahaaga la caddeystaa, meelaha lama dhukuso lamina dhuumaaleystee! Waxaan ku weydiiyey xaggee baad fulaynimadayda iyo inaan gabdhaha ka cabsado ku aragtay mase xogtayda ayaad ogtahay oo cid aan ka baqday ayaa jirta.
Iyadoo weli arrinkoodu dhana u dhicin, ayaa guryihii la soo gaadhay, Ubax oo markii horeba marmarsiinyo raadis ahayd, weydiinta dambena aan hayn meel ay afka u saarto, ayaa la soo booday " War hay noojine wiilyahaw iga hor leexo, haddaad libaax tahay waa lagu arki lahaa, haddiise aad kaftankii xalay weli daba socoto, wax badan ayaa kuu dhiman.
Iyadoo weli arrinkoodu dhana u dhicin, ayaa guryihii la soo gaadhay, Ubax oo markii horeba marmarsiinyo raadis ahayd, weydiinta dambena aan hayn meel ay afka u saarto, ayaa la soo booday " War hay noojine wiilyahaw iga hor leexo, haddaad libaax tahay waa lagu arki lahaa, haddiise aad kaftankii xalay weli daba socoto, wax badan ayaa kuu dhiman.
Tuba tu ku ilow, hadalkan dambe ayaa sida mariidka wadnaha Guhaad u ganay, waanu dhibsaday markan isagoo u arkay inay liidayso,ag joogeeda iyo wehelkeeda u aragtay nin aan waxba gelin.
Inta uu is galay ayuu hore u dhaqaaqay nabadeyna ma odhan, Ubaxna waxay u weecatay dhankii gurigooda, mase dareemin inuu ka xanaaqay hadalkii ay ku tidhi, burkaba bahal kama filanoo kalsoonida ay ku qabtaa qanjaha joogta.
Habeennimadii laysma arag, Guhaadna wuxuu go'aansaday inuu ka cag gaabiyo, hawlaheeda iyo xidhiidhkeedana aad u yareeyo, waxa beryay waagi, balse Guhaad wuxuu go'aansaday saaka inaysan indhahoodu is qaban mana sii marin mana sugine wuxuu toos u aaday dugsigii isagoo ka weecday marinkii ay mari jireen si aysan lama filaan ugu kulmin.
Ubax markay in doora sugtay aragtayna in uusan soo socon ayay is tidhi, iska bax yaadan daahine, mindhaa wax kale ayaa qabsaday oo mararka qaarkoodna waa dhici jirtay inay sidan oo kale intay isu waayaan hadhoow isku arkaan dugsiga.
Ubax waxay filanaysay kuna han weynayd inay isku arkayaan dugsiga oo ay kulmi doonaan, burkaba bahal kama filan, laabteeda dareen kuma jiro iyo ifafaale ay ku mutuhiso arrinkiisa.
Ma aysan arag oo iyadoo la kala xeroonayo albaabka dugsigana in la xidho ku dhaw yahay ayey orod ku soo gashay iley sugitaankiisa ayay ku daahdaye, markaasay intay orod isku taabatay degel aqooneedkeedkii abbaartay.
Markii la gaadhay biririftii ayay meelaha ka eeg eegtay mise maba joogo, oo waa maqan yahay, markan ayaa dareen galay oo is tidhi tolow maxaa helay? Ma jiran yahay mise reerkiibaa arrin kale oo aadan ogeyn ku soo kordhay?

@somalibooks

Waxay weydiisay wiilal ay isku degel aqooneed ahaayeen, waxayna u sheegeen inuu Baraha oggolaanshiiyo weydiistay oo xoogaa madax xanuun dareemayey, biririfta ka hor ayaana la sii daayey.
Wax dhiba uma aysan arage, markay gurigooda tagtay ayay galabnimadii guriga Reer Samatar oo aan ka dheereyn tagtay waxa ayna ugu la kulantey, Hooyo Dhudi oo daarada dhexe Alool ku samaynaysa iyada iyo dumar kale, heestii Aloolka ay si wada jir ah u wada qaadayaan weliba cod macaan.

- Alla waa xujooy waa xujooy
- Geel xerada diidaa waa xujooy
- Xero kale ka ololaa waa xujooy.
- Alla waa xujooy alla waa xujooy.

- Alla waa xujooy alla waa xujooy
- Faras xerada diidaa waa xujooy
- Xero kale ka dananaa waa xujooy
- Alla waa xujooy alla waa xujooy.
- Alla waa xujooy alla waa xujooy
- Gabadh xilaha diiddaa waa xujooy
- Xeelad bay ka wadataa waa xujooy
- Alla waa xujooy alla waa xujooy“

Ubax waxay la dhacday, sida quruxda badan ee ay isula helayaan habdhaca heesta iyo codka macaan ee haweenkan aysanba ka filayn, in cabbaar ah ayay la ashqaraarsanayd, kaddib ayaa Qadan ku soo baxday oo tidhi: Ubaxeey sidii qof aan arag weligeed maxaad la amakaagsan tahay.
Ubax oo is leh yaan lagaa libin helin oo ha noqon qof aan dhaqanka aqoon ayaa tidhi: Walaal Qadaneey sida aan maanta ugu fiirsaday uguma aanan fiirsan.
Iyagoo wada hadlaya ayaa Hooyo Dhudi u yeedhay oo ku tidhi: Naa heedheh Ubaxeey kaalay Aloolka nala samee, ileyn waan ogahay oo gaari baa ku dhashay adna gaari baad tahaye!
Ubax oo ammaanta la dhacday ayaa intay ag fadhiisatay tidhi: Eedo Dhudiyeey ma aqaano ee bal i tus?
Dhudina waxay ugu dhaqaaqday inay tusto sida laysu sudhayo xadhkaha ka samaysayn maryaha kala duwan ee suuf aloolka loo yaqaan ee laysku soohay iyo duurka dhilan ee is garab taxan.
Wax yar markay Ubax meeshii joogto, isheeduna intaas inuu bal guriga ka soo baxo oo daarada yimaad Guhaad ama uu bannaanka ka yimaad ku maqantahay, ayay markii dambe inta Qol dhardhaarka ugu tagtay Qadan oo hooyooyinka shaah u diyaarinaysa weydiisay: Miyaannu Guhaad maanta joogin?
Qadan oo aysan ku cusbayn weydiinta Ubax ayaa tidhi: Miyaanu kuu sheegin, inuu caawa oo jimce ahna u hoyan doono xaafadda Abti Deyr kana soo aadayo Satida dugsiga dhanka guriga abtiyo, miyeydaanse maanta is arag?

@somalibooks

Ubax weydiimahan is daba yaal ee Qadan ku darandooriday uma aysan haynin aan ahayn maya, waxa ayna iyada lafteedu is weydiinaysaa arrinkan ayaa ka yaabiyey Ubax waxayna garan weyday waxa soo kordhay ee saakana aysan isu arag, inuu maqnaananayo uu ula socodsiin waayey, Ubax burkaba bahal kama fileyso, iney wax dhintayna isuma aragtee, waxay go'aan ku gaadhay inay Sabtida la kulmi doonto.
Maalintii Sabtida ayaa qof weliba dhankiisa ka soo aaday Dugsiga, kaddibna Guhaad illeyn waa nin dan lehe, waa ka hor xerooday, isagoo doonaya in aysan dhicin inay kulmaan ama kansho wax laysku weydiiyaa aysan dhicin.
Markii la gaadhay biririftii ayaa si wed la kulan ah, laysaga soo hor baxay, balse Ubax uma helin ammin iyo kansho ay ku wareysatee, waxay go'aansatay inay hadhoow intaan la bixin sugto.
Mar allaale iyo markii bannaanka loo soo baxay ayuu ka sii baaraandegay oo Afar arday oo xaafadda Abtigii deganaa lugta ku darsadey dhexdana u galay dhankay xaafaddooda u aadi jireen maahine dhankii guriga abtigii xigay Afka, Ubaxna way ka xishootay inay wiilasha uu la socdo uga dhex yeedho.
Ubax dareen weyn ayaa galay markaan waxayna is weydiisay sida wax u jiraan, sidoo kale waxaa saameeyey maqnaanshiyihiisa, maskaxdeedii oodhanna waxaa ku dhex wareegaya Guhaad oo keliya waxayna u qaadan la' dahay, hadduu xaafadda aadayo muxuu kuugu sheegi waayey, oo sawtii Qadan ku lahayd Jimcaha qudha ayuu maqnaanayaa? Maankeeda ayaa waxaa ku kulmay weydiimo iyo aan warcelintooda la helayn iyadoo Guhaad la arko maahine.
Ubax waxay gashay baaxaa deg jiif iyo joogba u diiday, waxa ayna noqotay maqane jooga.
Xaalkeedu wuxuu marayaa, halkay ay hobollada Khadra daahir kaga xareedin jirtey:

- Mahiigaan Jacaylbaan
- Dhex muquurayaaye
- Miiraalihiisi
- midigta igu qaadyo
- Mawjad baa i sidatee.

- Naftu kay u muhataye
- Iga maqane waaye
- Ma maqanahay
- Ma joogaa
- Ma miir kacay
- Ma negi ahay
- Allahayoow muraadkayga
- Mar ii sahal

Ubax habeenkii hurdo aan negaadi iyo nasiino lahayn bay huruday, waagii markuu baryey ayay jarmaade ku jiiday si ay ula kulanto Guhaad inta aan degel aqooneedka la kala gelin. Balse, markay timid maba arag, waxay sugtoba markii qof weliba degel aqooneedkiisa galay ayay noqotay qofkii ugu dambeeyey ee ay Bare Shaqale ku wada kulmaan albaabka.

Markan si dhab ah ayey wax isu weydiisay arrinta keentay kala fogaanshaha iyo iska war hayn la'aanta cusub, waxaana la qumanaatay inaysan intaas ka badan dulqaadane ay bal cid kale dareenkeeda la wadaagto.
Maalintan ma uusan iman dugsiga oo waa ka maqnaa Ubaxna baadigoob badan kaddib waxay oggaatey inuusan iman oo maqan yahay, arrintanina waa ka sii maajisay.
Markii biririftii loo soo baxay ayay kulmeen Habboon oo iyadu la ayni ah Guhaad kuna jirta heerkii ugu dambeeyey ee Afraad ee dugsiga sare, waxa ayna uga sheekaysay inay la'dahay Guhaad iyo qaabka xidhiidhkoodu ahaa ilaa Khamiisti.
Habboon oo u aragtay in la galay widaaydeed ayna is ogeyn, ayaa weydiisay in ay jiraan wax ay ka qarinayso oo ku saabsan haasaawe iyo sheeko wadaag, balse, waa ka diiday heer ay dhaarato markay gaadhay, ayaa Habboon tidhi: Waa lagu daaray macaanto ee is deji!
Ubax intay qosol ilaa gawska dambe muuqdo, qososhay ayay tidhi, maxaa i daaray bisinka iyo burdahee?
Habboon ayaa iyadoo kajamaysa ugu warcelisay: Waxaa ku daaray kalgacal ugub ah oo weliba halis badan,waayo waa mid aadan isku ogeyn qofka aad dareenku kuu galayna aanu kuu ogeyn, waaba kii Cilmi Boodhari u dhintey.
Ubax ma garoowsan iyadoo sheekadii qabyo u tahay ayay kala tageen oo dawankii dugsiga ee ha la galo degelkaa yeedhay, qof weliba wuxuu afka saaray degelkiisi.?
Ubax baa mar qudha muruqyadu maskaxdu si majiire iyo kaynaan leh isu laba rogeen waxaana xasuusteedu mar qudha dib ugu laabatay, kulankii habeenkii Gallad iyo maalintii ka dambaysay doodi iyo kaftan dhablihii dhexmaray, eraygii ay ku tidhi iyo qaabkii uu uga dhaqaaqey ee aannu nabaaddiino dhihin, dhankeedana soo eegin.
Ubax waxaa halkaas uga soo baxay ismaandhaafkii dhexdooda iyo kaftankii inuu abuurey dareen markan waxa galay tuhun ah armuuba isagu ku jeclaa adna si qalloocan ula hadashay, haddana waxay soo xasuusatay iney waxaas iyo ka daran is odhan jireen aysanna dhici jirin in la kala xanaaqo.
Ubax maankeeda waxaa dhex miranaya is diiddooyin badan oo aysan aqoon dhan ay u qaado, waxaana ay aad ugu hammuun qabtaa aragtida iyo la kulanka Guhaad.
Galabnimadii ayaa iyadoo guriga hortiisa fadhida waxa ay aragtay gabadh ay deris ahaayeen oo xaafadda ilaa ammin gu' ku dhaw degganayd oo wiil derikooda ahi soo guursaday oo iyaduna guriga hortiisa soo joogsatay.
Gabadhii ayay u tagtay is bariidin iyo kaftan dabadeed ayay si degan ugu tidhi, walaal Deeqaay waxaan ku weydiiyey, horta adigaa illeyn iga waayo aragsane, qof gu' kaa weyne garaad kaa weyne jacaylku ma wax jiraa?
Deeqa oo aan la yaabin ogna in qofku markuu dhallinyarada yahay waxyaabo badan ka diimoon yihiin ayaa intey qososhay ugu warcelisay: Jacaylku waa wax jira waana kala duwan yahay, mid waxaa weeye Jacayl dhalan, waa kan labadaada tawl iyo walaalaha aad u hayso, midna waxaa la yidhaahda Jacayl dhaqmaati, Jacaylka dhalanka ah qof walba waa la dhashaa, Jacayl dhaqmaatigase waa mid kugu dhasha waana dareenka u dhaxeeya labka iyo dheddigga ee keena inay dhisme aqal iyo nolol dhammeystiran wadaagaan.
Ubax oo aan si fiican u helin dulucda ayaa mar kale ugu halcelisay: Ma dhici kartaa inaad

@somalibooks

jeclaato qof aan haasaawe iyo sheeko aydin wadaagin oo haba yaraatee wax wada hadal ah oo arrintaas ku saabsan dhexmarin?
Deeqa oo weydiintan dambe ay tuhun gelisay ayaa si degan ugu tidhi: Jacaylku isku si dadka uguma dhaco, dad markay wada hadlaan ee wada sheekaystaan ayuu ka dhex dhashaa, dadna dushaas iyagoo iska yaqaan ayaa midkood dareenka kalgacal galaa, dad intey is guursadaan iyaga oo aan is aqoon ayuu dhaqankooda iyo wada noolaanshaha kaddib curtaa, dadna iyaga oo is yaqaan oo aan wada hadlin ayaa qofba qofka kale dareen kalgacal u galaa, kanise waa yaryahay waana dhib badan yahay, mararka qaarna waa mid qof keliyaata ku koobma.
Sheekadan oo Ubax si weyn u xiisaynaysay waxaa uga dhexbaxay wax badan, waxay tidhi: Waayahee sidee kan dambe qofku ku ogaan karaa inuu qofkaas jecelyahay?
Deeqa la soo booday, dee waad igu ciyaaraysaa, gabadh weyn baad tahay wax walba waad ogtahaye iga daa dheeldheesha, maxaadse ku keentay maanta weydiimahan?
Ubax weydiinta ayay ku mergatay markaasay waa haween iyo dhaqankoode, markiiba dhan kale u rogtay oo tidhi: Berri baa dugsiga layga rabaa inaan faallo iyo warbixin togan ka bixiyo, marka sidaas ayaan kuu weydiiyey maxaa yeelay qof dhallinyaro ah oo dhawaan guursaday baad tahay xog badanna waan kaa heli karaa.
Deeqa oo u riyaaqday in aqoon laga soo doontay runna u qaadatay ayaa sheekooyin badan uga sheekaysay una kala dhigdhigtay arrimaha lagu garto, waxayna u sheegtay, in qofku qofka uu jecelyahay u boholyoobo, maqnaanshiyihiisa tebo, hadalkiisa dhegta u raariciyo, araggiisa ku il doogsado, la jooggiisana quud ka dhigto.
Mar qudha ayaa waxaa is dhalanrogey dareenkii Ubax oo aad mooddo inay Deeqi ka warramayso dahnigeeda, waxaana u soo baxay dhammaan astaamaha ay Deeqi sheegtay inay iyada dhex dabaalanayso.
In ammin ah markay wada joogeen ayay Deeqi nabadgelyeysay oo u sheegtay inay dhinaca magaalada u baxayso oo dano yaryar ka leedahay, sidii ayaa lagu kala tegay, Ubax xogtay ka heshay Deeqa iyo kaftankii Habboon ayaa maankeeda ku legdamaya, waxa ayna si dhab ah u oggolaatay in dareen jiro dhankeeda, arrintase is weydiinta mudan ayaa ah, Guhaad ma kula qabaa? Haddiise uusan kula qabin ma yahay mid dareemi kara? Mase tahay suurtagal inaad adigu u sheegato? Waa weydiimo maskaxda iyo maanka Ubax ka burqanaya mid qudhaata aysan u haynin warcelin sugan.
Ubaxna waxay go’aansatay in hadduu Guhaad berri iman waayo ay galabnimada kaxaysato Qadan oo ay guriga abtigeed geyso, halkaasna ay ku kulmaan iyada iyo Guhaad oo ay mar qudha indhaha uga qaado.

Guhaad dhankiisa waa qabaa boholyoowga iyo xiisaha hilowga leh ee u haya aragtida iyo la kulanka Ubax, balse cadhada ayaa ka awood badisay waxa uuna weli goconaya hadalkii uu u

@somalibooks

@somalibooks

arkay inay Ubax ku liidayso waana halka ismaandhaafku ka unkamay kana soo aloosmay keentayna inuu Guhaad ka fogaado widaaydiis iyo wehelkiisi Ubax.

Guhaad kuma dhaco inuu si badheedh ah u yidhaahdo ma kulmayno ama runtaba farta ka saaro, waayo isaguba ma jecla kumana dareensama inay kala maqnaadaan, waayo gadgadoonka maankiisa waxaa miranaya muuqaalka iyo xasuusta Ubax, sinaba ugama maqna goor iyo amminba arrinkooduna waa " Laba kala bariday kala war la'" waa wadnayaal isu gooman balse aan is ogeyn isuna gudbinayn inay dareenkooda gacal wadaagaan.

Galabnimadii ayay Ubax goor hore intay si qurux iyo haaneed leh hu' heemaal iyo bilicleh isku taagtay ayey tagtay gurigii reer Samatar oo intey u tagtay Qadan ka codsatay inay u raacdo guriga Abti Deyr, Qadana waxay tidhi " Waayahay ee bal Hooyo arrinkaas u sheegta si aan isu raacno"

Hooyo Dhudi kuma yaallo af diida arrin ay Ubax ka codsataye markii Ubax u sheegtay inay doonayso in Qadan raacdo si ay u soo tusto guriga Abti Deyr, iyadoo marmarsiinyona uga dhigtay iney buugaag uu leeyahay Guhaad ay ka rabto iyo inuu ka kaalmeeyo arrimo ku saabsan Bilkaydyada iyo jirrab aqooneedka soo fool leh.

Hooyo Dhudina waxa ay tidhi: Gobeeyeey gacalo waxaad tahay gabadh danteeda taqaan oo aan loo tilmaameyne, Ordoo is raaca isaguna haydin soo raaco ayay hooyo Dhudi warkii ku gebogebaysay.

Qadan ayaa si degdeg ah intay u qalab qaadatay oo iyaduna si aan ka liidan hubqaadka iyo heensaheeda u muujisay oo biligeeda iyo bilicdeeda ilqabadka leh dhar aad ay sareeyo

@somalibooks

tolmadooduna oo soo jiidasho lehna gashatay, waa la isa soo raaceen Ubax iyo Qadan iyadoo qofkii ka soo horbaxaaba uugsan daymada hore kaga dhergeyn ilaa uu dib u sii jaleeco.

Baarcad waa Magaalo weyn, balse inta badan looma kala raaco gaadiid, maxaa yeelay gaadiidka dadweynuhu aroornimada iyo ammino kooban ayuu hawlgalaa, waxa ay si quman labadii gabdhood sii taxaashiyaanba waddooyinka waaweyn ee bilicda leh, dhinacyadana goobaha ganacsi kaga taxan yihiin, hadba waxay waddoba waddo u dhiibto, ugu dambeyn waxaa la soo gaadhay halkii majiiruhu ahaa.

Labadii gabdhood kolkay tageen gurigii abti Deyr, haddii iridka la furayba waxaa isku dhacay indhihii Guhaad iyo Ubax, Guhaad kediso iyo filan waa ayaa kulankani ku noqday, garay in laga daba yimid, kuna riyaaq kulankiiye, waxaa is bariidin iyo is wareysi kaddib, loo sheegay in Ubax buug uu leeyahay ka rabtay, waxa kale oo loo sheegay farriintii hooyo Dhudi, isaguna si halhaleel ah ayuu agabkiisii oodhan usoo qaatay.

Jidkaa lagu soo dhacay kaftan goosgoos ah iyo sheeko madadaalo ah, kaddib waxaa socod dheer dabadeed la yimid gurigii, Qadan waxay ku weecatay gurigooda, isaguna wuxuu ku hadhay Ubax.

Ubax ayaa tidhi ” Guhaadoow waxaan ku moodayey inaad tahay widaaygeyga dadba iigu dhaw, balse in aad meel kale aado adiga oo aan ii sheegin, haddana dugsigii aad ka baaqato, waxaan dareemay in sida aan kuu ahay aadan ii ahayn, halka aad iga joogtana aanan kaa joogin, intay yara suurootey bay hadalkii ku goysay “ Dad iyo duurba waxa aadan fileyn ayaa kaa yimaad?

@somalibooks

Guhaad ayaa galgalasho iyo marmarsiinyo badan dabadeed isaguna dhankiisa ka qirey inuusan jirin jaal iyo widaay uga dhaw, balse, tani dhacday oo uu raaligelin ka bixinayo.

Ubax oo si kalsamaan ah uga heshay raali gelinta ayaa iyaduna dhankeeda iyadoo raad tiranaysa tidhi “Dee mindhaa kaftankii habeenkii baad ka xumaataye, haddaan waxaan kuu qalmin iyo hadal aan iga kaa qaban ku idhi raali ka noqo dhankayga”

Guhaad oo raaligelinta iyo garowshiiyaha isaguna la dhacay, haddana is adkaynayaa yidhi ” Mayee meeshii baan uga tegay, kamana xumaane maxaad dareentay?”

Ubax oo weydiin aysan filayn ku soo noqotaa intay kelyo iska baadhay tidhi” Dee markaan ku waayey, kuna arki waayey ayaan dib u raacay xasuustii, waxaana ila yara xumaaday, kaftankii oo waxaan is idhi eray rag lagu yidhaahdo ma ahayn.”

Guhaad oo raba bal inuu ka gun gaadho, ayaa ugu halcelshay “Waxaasi waxba ma ahoo hore ayey soomaalidu ugu maahmaahday, Naagi nimey taqaan nin ma moode, taas waxba uma arag, ee maxaad ku soo xasuusatay?

Ubax oo markan hubta in arrinku sidaa ay u aragtay yahay ayaa iyadoo boor isku qarinaysa, dareenkeedana si dadban u muujinaysaa ugu warcelisay “ Walaaloow marka aanan adiga nin kuu aqoon, agteydana aadan milge iyo maamuus ka lahayn, tolow yaan nin iyo qof mudnaan leh u aqaana?

Guhaad oo is leh yeysan kaa libin helin ayaa ugu halcelshay “ In aan nin ahay waad ogtahay, waadna ii taqaan, balse si gaar ah xil isagama kay saareysidoo, waxaa kuu caddeynaya adigoo aan garbasaar haysan, haddii labadeenna oo wada joogna, wiil kale oo cusubi inoo yimaad markaasaad is qarqaris iyo is

@somalibooks

mashashuur gelaysaa, marka kii kula joogay inaadan nin u aqoonin saw ma cadda? Guhaad oo hadalkiisa sii xoojinayaa yidhi “ Gabdhuhu waxay inta badan daneeyaan foolka cusub iyo qofka waageeniga ah, iyagoo aan waxba u arag qofka u dhaw ama jaalka la ah.

Ubax oo dareentay in ay geftay jaalkeeduna caddeyn aan meel looga dhuunta lahayn ku haysto, ayaa go’aansatay inay dhaahiso gacalkeeda, waxayna si dabacsan ugu tidhi “ Guhaadoow haddii rag oo dhan laysku soo daro mid aan kula simaa ma jireen, sidoo kale cid aan kugu doorsadaa ma jirteen, haddiiba rag lay kala dooransiin lahaa habdhaqankaaga, kartidaada, dadnimadaada iyo milgahaaga wiil aan kula jimeeya ma dhalan ma joogo cara edeg.

Guhaad oo kala badbatey ammaanta iyo dhaahinta ay Ubax ugu laba lixaadsatay ayaa is yidhi gabadha culayska iyo culaabta ka dulqaadoo yidhi “Innagu walaalo ayaan nahay widaaynimona waa noo dheertahay, marka dad kala xanaaqa iyo dad nuxnux hoose kala gasho ma nihine, haasaawe guud maahine mid gaar ahina inagama dhaxayn, dee wiilkii kuu yimaad ama gabdhii ii timaadna waxba uma dhibeyso xidhiidhkeenna iyo wadajirkeena sidaan filayo.”

Halkaas ayaa Ubax kansho ka heshay ayaa iyadoo dhoolacaddeynaysa tidhi “ Maxaa diidaya haddaynu dad jaal, widaay iyo wehel ahba nahay inaan wax kalena ku sii darsano oo intaa ka badan wadaagno, intii cid kale inoo iman lahaydna inagu isu nimaadno, mise midaas qorshahaba kuuguma jirto?”

Guhaad ayaa isagoo oo geesinnimona iska goobaya ku warceliyay: Haddii aan widaaynimo, jaalnimo iyo wehelba nahay, wax kalena inaan ku darsano, wax diidaya ma jiraan, balse maaha arrin aynu isla soo qaadnay, waxaan laga wada

@somalibooks

hadalna laguma heshiiyo, Guhaad ayaa sii raaciyey, haddii aan inta aan wadaagno ku darsan lahayn inta ka dhiman waxay noqon lahayd cawo iyo ayaane, sawtii soomaalidu ku maahmaahi jirtey “Ilays aqalkaaga looga baahan yahay, aqal dadoow looma iftiinsho”.

Ubax ayaa tidhi “ Guhaadoow kolay, intaan qof kale baran lahaa, adigaan ku aqaan, haddaad arrin iila timaad ogol baan dhihi lahaa.”

Guhaad oo tin iyo cidhib xaaddu istaagtay, hadalkaasina dareen hor leh geliyey, ayaa si qaboow u yidhi “Waa dhab oo dadka kalsoonida badan ka dhaxayso horena isula jaanqaaday, wax badan ayay wadaagi karaan.”

Guhaad waa ka meermeeray inuu abbaaro dulucda hadalka, balse Ubax iyadu waxay rabtaa haddiiba ay ogaato dareenka dhankiisa inay iyaduna gacalka gubaya kasheeda la wadaagto oo ay noqdaan kuwo nolosha guul ka gaadha.

Guhaad baa isagoo sidii qof saxday xiix xiix haya hadalkii sii raaciyey “ Ubaxeey Geedka midhihiisa la yaqaana la gurtaaye, dadkana midka aad alabkiisa taqaana arrin lala wadaagaaye, aniga waxaan qabaa inaan joogno heerkaan wax walba isu sheegan lahayn, ileyn dad waaweyn baan noqonaye.

Guhaad malaha mana hayo kelyo uu ku yidhaahdo: Rabitaan iyo kalgacalbaan kuu qabaa, aad buu uga hamranaya, inuu ku dhiiradana wax walba waa ay kala culustahay, waase dareensan yahay inuu arageeda, la joogeeda, barbar socodkeeda iyo sheeko wadaageedu kala weyn yahay wax walba ayna ka mudan tahay qof walba.

@somalibooks

Guhaad iyo Ubax habeenkaas sidaa ayay ku kala hoydeen, iyadoo uusan qofna si badheedh ah u sheegan dareenkiisa, balse, hadal waayeel iyo kaftan gobeed laysu dul xaadiyey, qaab ka duwan qaabkii loo sheekaysan jirayna loo sheekaystay, iyadoo weliba kala goob yaallayo oo hadalka daaqsin geel laysu marsiinayo.

Guhaad oo xasuustaas iyo waayaha dhex dabbaalanaya, maankiisu ku hawshan yahay oo isla baraad la' ayaa mar qudha maqlay sanqadh xooggan iyo dad is daba dudaya, hadduu dhankii albaabka eegayna, waxaaba soo galay koox uu horjoogo taliye Duubane, waxba lama weydiine inta dhankiisa la soo aaday, ayaa lala booday inta afarta addin la qabtey. Waxba markan baqdini ma gelin waayo waa hayimay, dilka iyo garaacana waa qabatiyey wuxuu ku talo galay in sidii waagii loo geli jirey uun loo gelayo, markanse hawshu waa ka duwan tahay.

Inkastoo uu kadeedkii iyo xakaarki uu ka nasta ammin xoogaa ah, dilkii iyo garaacina laga joojiyey, balse hatigaadi iyo cagajugleyntuba dilka ka daran, waxaa la keenay barxada dhexe ee qabir dadeedka, oo nalal waaweyn ka shidan yihiin, jilbaha ayaa dhulka loo dhigay meel dhagax quruurux iyo qalaxi buuxo, idnahana waa laga xidhay.

Isagoo mugdi ka soo baxay nalalki ifka badnaana aragiisa mugdi geliyeen ayaa haddana indhaha laga sii xidhay, waxaana la saaray baabuur, In ku dhaw 45 cagood(miridh) la joojiyey baabuurkii, baabuurku wuxuu ahaa baabuur gaashaaman oo aabudhan ciidan ayaa hareeraha ka fadhiyey, balse markii la joojiyey ee iridka la furay ayuu maqlay hugunka iyo guuxa hirarka gugcaya waa uuna dareemay in meel xeeb ah la keenay.

Taliye Duubane ayaa qaylo dheer ku faray inay ciidanku is diyaariyaan isagoo leh " Diyaar garow, wuxuu kale oo maqlay jaanta ciidanka digtoonida galay oo uu ku mutuhiyey ilaa lix ciidan ah, mid ka mid ah ayaa intuu sida awrta u tujiyey oo jilbaha dhulka u dhigay ayuu xadhigii gacmaha uga xidhna ee garduubka loogu xidhayna ku giijiyey.

Guhaad wuxuu oggolaaday geerida, waa nin ciidan ah oo si wanaagsan loo tabbabaray, wax argagax ah lama uusan kulmin, waayo hore ayaa loo siiyey tabbobarka iyo u adkaysiga maalinta geeridu ku timaad inuusan bilqan oo cataabin, haddana waxa uu arkay inay kama dambaystii tahay.

Markuu maqlay sanqadha qoryaha xabbada la raacsiiyey,ayuu intuu si wanaagsan u soo jilbaha oo dhulka ugu aastay luquntana toosiyey isu diyaariyey inuu geeri gobeed dhinto. Kaddib ayaa mar qudha ooda looga qaaday rasaas, habaaska iyo ciida ay kicinayso faniinkeeda ayuu ku asqoobey, sanqadh xooggana waa mid aan ku cusbeyn oo waa nin tabbobar ciidan qaba, maantase wuxuu sugaya geeridiisi.

Markii ilbidhiqsiyo xabbadu dhankiisa ku soo dhacaysay welina uu jilbihii dhulka ku hayo, balse waxaa ka dhaadhacsan xabbaduhu waa ku dhaceen ee weli xanuunka ayaan ku soo gudbin.

Garowsay markan inaysan xabbaduhu ku dhicin wuxuu is weydiiyey sidee wax u jiraan? Ugu dambeyn waxaa isa soo dul taagay oo dhafoorka ka saaray Bastoolad taliye Duubane

@somalibooks

wuxuuna ku celceliyey weydiimihii hore loo weydiin jiray isagoo leh waxaad haysataa kansho wanaagsan inaad naftaada badbaadiso.

Guhaad ayaa intuu si karti leh ula hadlay ku yidhi " Taliye waad ogtahay inaan ahay nin ciidan ah, haddaan ka baqanayo geeri iyo xabbad shafta layga dhuftana ma aanan gashadeen dharka giirgiirka leh ee ciidanka, marka inaan dhimanayo haygu hanjabin , ciddii ku soo fartay inaad i disho fuli waxay ku fareen, haddii kale guulguulka iga daa, waxaan ahay nin dalkiisa iyo dadkiisa u dhaartay, halkana waxaa i keenay dad aanan ogayn ujeedka ay ka leeyihiin noloshayda"

Taliye Duubane waa nin loo carbiyey raxanraadinta iyo kadeedka ciidanka, waxaana loo soo gudbiyaa keliya qofkii xog ciidan laga raadinayo oo dalka iyo dadka godob ka galay.

Waa uu arkay waana garowsaday nin da'daa jira oo intaas oo kadeed ah uu marshay in uusan waxba ka soo saari karayn inuu dilo maahine, waxa uuna amar ku siiyey ciidanka in dib loo saaro baabuurka.

Isagoo sidii indhaha uga xidhan ayaa lagu soo celiyey halkii laga waday iyo godkii madoobaa ee uu ku xidhnaa.

Oday Dirir oo ka werwersanaa " Kor waayeel waa wada indhee" isna lahaa caawa waa habeenkii colki qalan lahaa wiilka yar ee dhallinyarada ah, ayaa ku obsiyey una riyaaqay markii isagoo nool dib loo soo celiyey, Oday Dirir iyo Guhaad yaannu xidhiidh wanaagsani kala dhaxeyn, haddana waa dad nolosha ku deris ah qol madoow waa is weheshadaan.

Dirir wuxuu ahaa nin madax ah oo milge iyo maamuus bulshada dhexdeeda ku leh, nin dareen dal jacayl iyo gobonnimo isku darsaday, nin bulshadiisa ku hawlan horumarinteeda, waxaase halkaas dhigay, niman u qaba ciil iyo godob hore oo kula dagaalansanaa oo uu ka diiday wax is daba marin iyo hanti lunsi, taasoo keentay in lagu oogo qaan iyo eed uusan falin lagana dhigo nin dalka iyo dadka dhagray.

Niman ay in badan is yaqaaneen kuna hawlan dib u dhaca iyo kala dilka bulshada oo ugaadhsi ku haya qof walba oo ay ku tuhmaan ama ku tebayaan wanaag iyo dal jacayl.

Dirir ayaa laf dhuun gashay, kaddib markuu ka ilaaliyey inay gacantooda gasho lacag iyo hanti booli ah oo aan waddo xeerka ku qotonta loo soo marin.

Tuug iyo nin hufan heshiis maaha ee waxaa loo maleegay dabin waxaana u tashaday niman xumo isku biirsaday iyo inay bulshada dhibaateeyaan.

Kaddib ka soo noqoshadii dagaalkii xabashida dalku wuxuu galay is qabqabsi iyo kala orod, tuhun iyo dareen qofba qofka kale iska dhawro, waxaana arrintaas kansho ka dhex helay, raggii ciilka iyo utunta hore qabay Dirir oo weligoodba la goobay shirqool ay ku dhagareeyaan. Kooxahani ma jirto aano iyo anafo aan ahayn inuu ka ilaaliyey hantida dalka inay si qalloocan u adeegsadaan.

Kooxdan "Gaashaanbuurta" waa koox isku xidhan oo ka midaysan inay awoodda iyo heerka maamuus ay joogaan ku daneystaan, kaalin walbana dowladda way kaga jiraan, marka way fududahay inay u maleegaan dabin qofkii ka hor yimaadan rabitaankooda iyo hawshooda eek u ad adag xeerka iyo heshiis bulsheedka dalka u degan.

Ugu dambeyn waxaa ay daba socdaanba waxay gacanta ku dhigeen dhammaan gacan yarayaashii Dirir oo malas loo daadiyey, Afkana loo buuxiyey, balanqaad wanaagsan iyo kor

@somalibooks

u qaad heer hawleedna loo carrabaabay.Dirirna waxay ku soo xidhay meeshan iyagoo ku oogay qaan uusan qabin.
Markii Guhaad la soo geliyey ayaa Dirir oo arrinkiisa aan waxba ka mooganeyn, qayladiisa iyo saskiisa habeenkii oodhana ka war haya, ayaa isku dayey bal inay wada hadlaan.
Oday Dirir ayaa isku dayey markan inuu wareysto, wuxuu yidhi “Wiiloow dhibka ku haya amba waa soo maray, saddex bilood oo dhalatay, dhammaatayna ayaa dil iyo garaac laygu hayey, jirkaygana meel nooli ma jirto, markay iga daaleene, waxay igu soo tureen meeshan, waana laga baxaya goor ay noqoto guul iyo geeri midkood.
Guhaad oo hadalkan dhiirigelinta ah u riyaaqay isagoo markan uu ka baxay tuhunkii uu hore u qabay ku yidhi “ Been maaha adeer waa laga baxaya nolol iyo geeri midkay noqotaba”.
Dirir oo dareemay inuu soo dhiiraday Guhaad ayaa si degan oo kooban ugu warceliyey “Magacaygu waa Dirir Colaad, waxaana meeshan ku xiranahay shanta intii aad ila joogtay iyo Lix bilood kaa sii horreysay, maalin welibana waa ii tirsan tahay gardarada godkaa madoow laygu riday, waxaa halkan lay keenayna ma ogi waxayse ila tahay waa kaa xoog badni”.
Guhaad ayaa yidhi “ Adeer magacaygu waa Guhaad Samatar, dhibta ku hayana maaha mid iga qarsoon, aniga laftaydu haddaan ogaan lahaa waxaa aan meesha ugu jiro ama ay jiri lahayd gabboodfal aan sameeyey, dhib uma arkeen waayo waxaad gef geysato in laga gooya maaha wax culeys ah, waxaase wax laga tiiraanyoodo ah, dalkaad u halgameysay iyo dadkaad u halgameysay markay horror kaa dhigaan oo ku halgaadaan”.
Intaas markii lays dhaafsaday ayaa waxaa soo wareysigii dib u bilaabay, Dirir oo yiri “Ciidanka miyaad ka tirsanayd?”
Guhaad “Haa, ciidanka xoogga dalka, weliba waxaan ahay kabtan buuxa, waxaan ka mid ahaa ardaydii markay dugsiga sare ka baxeen ee gurmadka soo mareen iyagu doortay inay ka mid noqdaan ciidanka, waxaana tababar laygu direy dalalka masar iyo talyaaniga.
Waxaan ahay sarkaal ka tirsana qaybta 91aad kana hawl gala guud ahaan gobollada Kor iyo Oogo, inkastoo aysan jirin meel u gaar ah ciidanka oo hadba talisku meeshii rabo kuu dirayo, waxaan ka mid ahaa ragga ayaanka iyo cawada u helay in deegaankii ay ku koreen ay ka adeegaan kana hawlgalaan.
Dirir oo garowsaday marka ninkan in dhibka haystaa uu la mid yahay kiisa ayaa u bilaabay inuu uga sheekeeyo noloshiisa wuxuu yiri:.....
Dirir oo garowsaday marka ninkan in dhibka haystaa uu la mid yahay kiisa ayaa u bilaabay inuu uga sheekeeyo noloshiisa wuxuu yiri “Wiilyahaw wax kasta aad jeceshahay ama aad si aragto, waxaa jira dar si ka duwan kuu arka, wanaaggu dadka qaar waa dhibaa, kuwana waa u dhaqan.
Waxaan ku indho dilaacsaday soomaali oo mid ah isku duuban oo wadajirta nacabkii saancaddaalaha iyo gumeysiga dhan uga soo wada jeeda, anigoo yar oo reer miyi ah, ayaa kacaankii gobonnimada doonka ee xera geelka looga sheekaynayey laabtayda xulay, waxaan go’aansaday inaan geela iyo reerkaba iskaga tago oo aan ka baxsado.
Waxa aan rabaa inaan ka qaybgalo gobonnimodoonka oo aan ku biro dhallintii leegada oo

@somalibooks

aan naftayda u huro dalkayga iyo dadkayga
Waxaan imid magaalada Mahadweyn oo aanan cidna ka aqoon gaar ah marka laga reebo adeerkay Abtidoon oo aabbahay ay ilmo habreed yihiin aadna noo dhaqaalayn jiray oo dhar iyo cunto magaalada nooga soo diri jirey, aabbena socoto walba wax ugu soo dhiibi jirey inuu maqalka ku hayo inuu deganyahay magaaladan.
Adeerkay waa nin magac dheer oo si weyna looga yaqaanay magaalada.Markaan in cabbaar ah meelaha warwareegay ayaan bilaabay baafis iyo yabooh si aan adeerkay cid taqaanno u helo. waxa aanan markii dambe helay islaan taqaan iyada ayaana siday ii waday gurigiisa ii geysay.
Adeerkay waa i soo dhaweeyey si kal iyo lab ah, waxaana layga dhigay nin guri boqortooyo yimid, adeerkay waa nin furfuran oo reer magaal ah, kaftan badan, inkastoo uu hawshaysnaa oo arrimaha ganacsiga iyo hawsha gobonnimo doonku ku hawshaysnaa, haddana aniga iyo carruurtiisa oo iga yaryarayd, aad buu nooga war hayey noona siin jirey ammin iyo milay uu nagula caweeyo.
Markaan laba maalmood joogay ayuu ii yeedhay wuxuuna i weydiiyey " Maxaa reerkii kaa keenay? Maxaadse u socotay in aad magaalada ka qabsato, bal ii warran adeer?"
Anigu ma laba labeyne waxaan idhi " Waxaan dad badan oo magaalada ka yimid ka maqlay in Leego la aas aasay oo dalka gobonnimadiisa u dirirayaan, gumeystaha iyo saancaddaha cadna dalka laga saarayo, aniguna inaan ku biiro Leegada Ayaan rabaa".
Adeerkay ayaa arrinkan u qaadan waayey, waayo anigu ma ogeyn inuu isagu xubin weyn ka yahay Leegada, kuna jiro arrimaha dedaalka dalka iyo dadka gobonnimada loogu goobayo.
Adeerkay ayaa gacanta iga qabtay waxa uuna i geeyey meel guri ku dhextaal oo weegaar ah, oo la daleeyey, oo ay rag badani dhooban yihiin, kaddib intuu is dhex taagay ayuu yidhi " Ninka u maleeya waxa aynu halkan ku hayno qarow iyo calwasaadoow, bal ilmahaa yar wareysta, wuxuu ka yimid, Maygaag cadde, wuxuuna u yimid Mahadweyn bal weydiiya!
Nin odaya ah oo gadhweyn oo filsan astaantii salaadduna foolkiisa ka muuqato ayaa hadalkii bilaabay oo yidhi: " Wiilow bal loo warran?"
Markaas ayaa amigo waxooga firka nax iyo dareen xishoodihi i galay haddana intaan xiniinyo is galshay u sheegay intaan adeerkay u sheegay, aad baa loo wada riyaaqay, waana layla booday, waxaana noqday tusaale lagu dhiirigeliyo dhallinyarada iyo kuwa iga waaweyn.
Habeenkaas ayaa waxaa ii curatay nolol ka duwan tii miyiga, waxaana laba maalmo kaddib markii lay arrad tirey lay geeyey dugsi quraanka, inkastoo dugsi quraanka hore aan miyiga ugu dhiganayey oo wax yar baa ii dhinaa, waxaa kale oo maalmo kaddib lay geeyey dugsi waxbarasho.
Waxaa adeerkay Abtidoon igu dhiirigeliyey inaan waxbarto si aan dalka u horumariyo una noqdo nin dadkiisa u hiiliya. Maalintaas kaddib waxaana noqday nin firfircoon, oo dedaal badan, dhinaca kale halganka dhinacayga Ayaan kaga jirey inkastoo aan yaraa.
Markaan waxbarashadii dhammeeyey ayaa adeero ii qalqaaliyey in dibadda lay qaado oo aan waxbarashada ku soo dhammaystirto dalka masar iyo dalka talyaaniga.
Markaan dalka ku soo noqday iyadoo gobonnimadii la qaatay, waxaan bilaabay inaan si hagar la'aan iyo iskaa wax u qabso ah ugu shaqeeyo bulshada soomaaliyeed.

@somalibooks

Dareenkaygii dad iyo dal jacaylka ahaa igama bixin waxaan tegay dalalka masar iyo talyaaniga oo labadaba aan waxbarasho u tegay, waxaan ku naaloonayey in dalkaygu ka qurux badnaado kana dhaqaale badnaado.

Ammin kooban kaddib soo laabashadaydii waxaa geeriyooday Adeerkay inkastoo loo aaneeyo in nacabkii saancaddaaluhu shirqool u dhigeen waxaa lama huraan noqotey inaan la wareegay xilkii agoontii adeerkay iyo dhammaan qoyskii aan ka dhashay, waxaan ka mid noqday dadkii ugu horreeyey ee wasaaradda maaliyadda ka hawl bilaabay.

Dirir wuxuu yidhi: "Waxaan habeen iyo dharaar ku heegan inaan aqoonteyda dalkayga ugu adeegayo waxa aana hawlanaa horumarinta dhulkayga.

Halkaa markuu marayey ayuu yara aamusay oo goroda laadlaadiyey, wuxuu sii watay hadalkiisii wuxuuna uga sheegay Guhaad in uu ahaa Aabbe iyo waalid u taagan korinta ubadkiisa sidoo kalena nin u dhaartay horumarinta dalkayga.

Waxaa layga dhigay tuug taasoo ah arrin sooyaal xumo u ah ubadkayga in aabbe tuug ahi dhalay oo waxay ku noolaayeene tuugo ahayd, waxaa kale oo abaalkaygii laga dhigay in garbaduub lay xidho, habeen iyo maalina laygu jidh dilo layna garaaco waxaanan war iyo wacaal ka haynin.

Guhaad oo aad ula murugooday ayaa weydiiyey "Sidee baa laguu dhagray? maxayse tahay tuuggada lagugu haysto? yaa ku shirqooleyse?

Dirir oo weydiimahan ka warcelinaya ayaa wuxuu u sheegay Guhaad, waxaan ahaan nin hufnaan iyo dhawrsoonaan ku guta xilkiisa iskana ilaaliya in shilin booli ah ku soo weecdo, waxaan dalka u shaqaynayey laga soo bilaabo 1961-1983 ammin gaaraysa 22 gu' inkastoo aan Hawlfalyo(mashruuc) badan oo horumarineed ka soo qabtay wax inta badan waxaan u ahaa hawlwadeen wasaaradda maaliyada ah.

Waxaan deganahay guri shan qol ah oo xaafaddaha magaalada ee dadweynuhu deganyahay ku dhexyaal, gurigaasna shan gu' ayuu dhismihiisu igu qaatay, iyadoo weliba dad xigaalo ah iyo widaayo igu garab istaageen inaan carruurta guri u dhiso, weligayna gaari ama baabuur ma yeelan, waxaa jirey mid dowladdu i siisay oo ay iska lahayd.

Ninkaygii sidaa ahaa waxaa laygu eedeeyey inaan lunsaday hanti gaaraysa 40 Milyan oo shilin soomaali ah, arrinta la yaabka leh ayaa ah in lagala baxay kaydka dowladda lagulana baxay sumadinteyda(saxeex) laba Milyan oo ka mid ahna lagu xaseeyey oo lagu qariyey qol hawleedkayga(xafiiska) meel ka mid ah, markii laamaha xog doonka iyo xuuraanku baareena lacagta maqan iyo mida laga helay xafiiskaygu waa isku tireyn.

Qareen walba oo lay qabtay wuxuu ka gacan taagay waayo maalinta aan u dhiibo galalkayga habeennimada ku xigta isaga oo wada ayuu ii keenayey.Waxaa ugu dambayn layla tiigsaday garsoorka iyadoo lay sheegay in baadhitaankaygu soo dhammaaday wax walibana ay igu cad yahay waxaana halkan ku sugayaa dil toogasho ah, waxaa laygu qaaday xeerka "Xisaabi xil ma leh"

Intaa uu hadlayo Dirir Colaad waxaa indhihiisa ku taagan ilmo ciilka iyo caloolyowgu ka keenayo waana faruuryo qaniinsan yahay. Guhaad waxaa ka soo hadhay indho keliya waxaa uuna aad ula yaabay meesha laga wada maagay isaga iyo Dirir inay isu eg yihiin.

Dirir, wuxuu u sheegay in ilaa hadda uusan garanayn cidda shirqoolkaas u dhigtay, balse

@somalibooks

hadduu garanayo inaanu sinaba u dhaafeen ee uu ka aar gudan lahaa, wuxuu yidhi: " Intaan halkan ku jiray ma jiro qof qoyskayga ah oo i soo booqday ama aan arkay, mana ogi xaalka ubadkayga iyo ooridaydu ku sugan yihiin.
Guhaad ayaa isaga oo raba inuu laabta u qaboojiyo wadnahana u adkeeyo ku yiri "Adeer Diriroow igana waayo aragsanid igana xog ogaalsanid, balse, ogoow in ay iman doonto maalin aad ka sheekayso, haddana arrinta ubadka iyo oorida aad ka dhawaajisay, eebbe u daa isaga ayaa ilaalinayaa, nacabka iyo colka kuu tashadayna waxba kama qaadi doonaan, waxaana ii muuqata in dalkeena duulaan hoose iyo gacan shisheeye ku jirto, waana tan keentay in dadkii wanaagsanaa la ugaadhsado intii xumeydna la boqro.
Dirir baa yidhi " Beribaa nin wuxuu garsoor xumo kaga timid nabaddoonka beeshiisa u tiriyey gabay dheera, waxaase ka hadhay halqabsi ahaa:

- Rag caddaalad waayaa sidii, Cawsha kala yaacye
- Caarrow shabeel iyo Dhurwaa, Nalagu cawreeye
- Canka nagu gur bahal Goodiroo, Loo cimaamaday

Garsoorxumadu waxay dhashaa kala guur iyo guluf aan damin, waxayna kala goysaa laba gacmood oo wadajirey, ogoowna gabboodfalka maanta kuwa noo geysanaya waxba innagama dambeyn doonaan, iyagana waxaa heli doona duul ka awood badan oo naftooda halis iyo halako geliya.
Dirir oo markan ka soo noqday xasuusti fogeyd ayaa intuu si haneedsan u soo fadhiistay go'iina dooyeystay yidhi " Guhaadoow waxaan ku weydiiyey maxay ahayd gabadhan aad habeen iyo maalin magaceeda ku qarowdaa ee aad Ubaxeey ubaxeyda haysaa?
Guhaadbaa intuu naxay oo yaabay wuxuu ku hadlona garan waayey yidhi " Oo ma anigoo ku qarwayaad maqashay?"
Labadoodiiba waa isla qosleen, Guhaadna ogaa inaan waxba u qarsooneyn, markaasuu sheekada ugu soo bilaabay ilaa yaraantoodi, qaabkay ahaayeen iyo siday isula soo jaanqaadeen, ugu dambeyna wuxuu u sheegay inay noqdeen far iyo fargashi ama ul iyo diir ku midoobay nolosha kalgacalka.
Wuxuu yidhi "Ammin dheer ayaan kala gabanayn oo qof weliba wuxuu qabo qarsanayey, hase yeeshee, habeen habeennada ka mid ah, ayaa waxaa xanuunsatay hooyaday oo neeftu qabatay, kaddibna waxaa lay direy inaan doono dhakhtar in doora noo jirey inaan u yeedho ammintuna waa saqdhexe magaaladu awalba ma if badnayn haddana nalkii waa la damiyey meel furanina ma jirto, socodkuna waa dani kugu qabatay.
Ubax oo iyada iyo reerkooduba ku soo kaceen yabaqayaga ayaa i tidhi waan ku raacaya, anna waan ka diiday, markaasay intay ii soo dhawaatay tidhi " Haddii aad ii oggolaato inaan ku raaco war xiise leh oo aad la dhacdo kuna dareensamaato ayaan kuu sheegi doona"
Waan yaabay waxaana is idhi tolow maxay kuu sheegi doonta waa ka yeelay aniguna waxa aan ka filayaa inay waxa aan rabo ii sheegto ileyn ku dhci waayaye ,way isoo raacday, hadba waxaan dhan kaga imaado ileyn oggolaaday oo iga hadh ma odhan karee, markii dambe ayaan weydiiyey " maxaad ii sheegi lahayd oo aan u riyaaqi lahaa Ubaxeey?
Intey qososhay bay tidhi "Waxba ee inaan ku soo raaco ayaan rabay waana ku guuleystay inaan ku soo raace ina dheeraysi aan dhakhtarka u yeedhne".

@somalibooks

Dhakhtarkii ayaan u yeedhnay markuu arkay xaalka hooyo ayuu noo sheegay in dhakhsi loo baahan yahay in la geeyo xarunta caafimaadka gobolka ayna wanaagsan tahay in qof gaadhi leh oo deriska ah la raadiyo,. in qof gaadhi leh xaafadda laga doono, waxaase jirey oo aan naga fogeyn oday deriska ah oo hooyona ay xaaskiisa wax isku yihiine, isagii baana laga kacashay oo markuu arkay sida arrin yahay nala orday.
Yaa raacayaba intaan la odhan ayay Ubax la soo booday idinku iska seexda, anigaa wehelinaya Guhaad, reerkii oodhamina guddoon bay yidhaahdeen, sidaasaanuna labadayadii ku soo baxnay, mid walba oo naga mid ah kansho iyo meel cidla ah inaan isku helno waa jecelyahay.
Ubax iyo anigu habeenkii oodhan waa isla joognay hooyana dedaal iyo ogaalbaa loogu dhaqaaqay markii dambe Irbad baa lagu muday neeftiina waa ka soo raysay, kaddibna daalkii iyo hiinraagi ayay iska gataati dhacday oo seexatay.
Aniga iyo Ubaxna hurda iyo meel aan seexano ma aanaan hayne soo jeed baan ku qaadaney, ugu dambeyn annagoo xiddigaha tirinayna ayey Ubax igu tidhi “wax maku weydiin karaa?
Anna waxaan ugu warcelshay “waxaad doonto i weydii ”Waxaana na dhexmartay dood dheer iyo falanqeyn badan, waxayna ubax i weydiisay markii dambe:
Ubax: Guhaadoow horta walaaloow weligaa wax ma jeclaatay?
Guhaad: Haa weligayba wax waan jeclaa ilaa haddana waa jeclahay.
Ubax: Yaad jeclaatay?
Guhaad: Waxaad jeclahay hooyaday oo waa aniga u soo jeeda amminta iyo milleyga aad arkayso.
Ubax: Kaasi waa dhalan jacayl ee waxaan ka hadlayaa dhaqmaati.
Guhaad: Maxay kala yihiin?
Ubax: Dhalan jacayl waa midka aad la dhalato dhuuxaaga iyo dhiigaagana raacsan, sida jacaylka walaalka, waalidkaa iyo gacalkaaga kale. Dhaqmaatina waa jacaylka dareenka qof kale kuu gala.
Guhaad: Haa aniguse si kale ayaan u aqaana.
Ubax: Sidee baad u taqaan
Guhaad: Jacayl guud iyo mid gaar ah, Jacaylka guud waa midka aad jeceshahay dadka kuu dhaw sida qoyskaaga, walaal iyo waalid, widaay iyo waxyaabaha ama walxaha naftaadu xiisayso ee ay ka hesho, jacaylka gaarka ahina waa midka ku yimaada dareen aad u qabto qof kaa cayn duwan ama rag ah ama dumar hadba kaa tahay maahine kan kale.
Ubax: Wax garad baad tahay “ Oodi qaadis iyo jiidis waa isla meeshi” hadda waan isla garanay ee midka guud maahine miyaadan mid gaar ahba weligaa dareemin?
Guhaad oo cirka iyo dhulkuba ku yaraadeen xiddigihiina korkiisa yimaadeen, ayaa inta neef weyni ka soo fuqday la soo booday “ Haa waan jeclahay, balse inay i jeceshahay iyo in kale ma ogi, waana tan keentay inaan ka meermeero”
Ubax oo marna naxday marna obsiday ayaa is weydiisay armuu qof kale kuu sheega, oo aad bad isku gashaa, haddana waxay nabdiga iska tidhi “God iyo ninkii loo wado lama kala qariye” ha sheego cidda uu jecelyahay, waxay tidhi “ Oo waa tuma gabadhaas hooyadeed

@somalibooks

iyo aabbaheed inay dhurowdo eebbe uga tuugeen ee aad jeclaatay tolow ma garanayaa anigu?
Guhaad yaa ugu warceliyey " Haa waad garanaysaa waadna taqaana aad oo weyn"
Ubax oo weli daba socota doonaysana inay weydiinteena meel cad uga soo hadhaa tidhi walaaloow waa tuma taasi?
Guhaad ayaa inta naf is galshay is yidhi meeshay doonto hakaala dhacdee kanshadan yeysan kula dhaafin markaasuu yidhi " Cid kaleba maahee waa adigan Ubax Carraale ah!
Ubax shibay tidhi, waxayna kala saari weyday inuu yoolbaadhayo iyo iney dhab ka tahay, waxay garan weyday waxa ay kaga halceliso, waxaana dhanxanageeda ku dhegay hadalkii, waxaa wadnaheedu isu garaacay si saddex jibbaar ah sidii uu muggii hore isugu garaaci jirey, waxa isna war dhawr ah Guhaad oo leeb ka fuqay naftiisa, balse aan ogayn waxaa uu kala kulmi doono, isagoo laba arrimoodba ula diyaar ah, inuu yidhaahdo haddey ku gacan saydho, waan iska ciyaarayey dhibkiisana qarsado iyo in haddii ay ka yeesho waa samaad u beryo doono berida gooraha gaabani ka hadheen.
Markuu dhankeeda ka waayey warcelin ayuu haddana ku dhiiraday oo yidhi " Haddaan kuu sheegay cidda aan jeclahay, maxaadan wax u dhihin ee aad la aamustay"
Ubax oo meel ay ka wax billowdo la' ayaa tidhi " Naga daa ciyaarta ee qofka aad jeceshahay ee aad iga qarsanaysey ii sheeg, anigu ayaankaas iyo biligaa ma lihi aan Guhaad jacaylkiisa ku noqonaye"
Guhaad ayaa isaga oo dareemay in aysan waxba diidanayn balse xishoodku ka awood badshay, ku celiyey, sawtii xaalku ahaa maaha, Ubaxeey " Ruux hadduu ku jeclaado, ku jantay baa la yidhaa" haddii aadan i jeclayn maad ku jantay iska tidhaahdid.
Ubax oo markay heshay oo ogaatey waxay rabtay nabdiguna u qaboobay ayaa tidhi " Haddii laabtayda laguu furi lahaa oo daawo lagu dhihi lahaa waxaad ogaan lahayd wax badan"
Guhaad oo dareen sakati ah galay oo is leh, ma waxay ku dhihi doontaa Qofna laba qof ma wada jeclaade, qof kale ayaan jeclahay" ayaa isaga oo digtoon weydiiyey " Oo tolow maxaan ku arki lahaa?"
Intey indho naxariis leh ku soo bacleeshay, jaleeco dareen gacalnimo huwana ku eegtay ayay tidhi " Waxaad ogaan lahayd in magacaagu meel walba xidida halbowlayaasha iyo aroorayaasha uga xardhan yahay, aadna tahay qofka keliya ee aan cara edeg waxa eebbe rag uumay ka shansanayo"
Guhaad oo intuu kala badbatey riyaaqa iyo obsiga dartiis inuu dilaaco ku dhaw ayaa intuu gacan qaad u soo taagay wuxuu ku luuqeeyey heestii hobolkii caanka ahaa Maxamed Mooge:

- Mudantii haweenkaay
- Marwadii la sheegee
- Dadku wada majeertee
- Dumar lama maseeyee
- Muxubada kalgacalkaay.

- Laanyahay magooshee
- Midhihiyo caleentiyo

@somalibooks

- Manka lagu tallaalee
- Ubax lagu mariimayee
- Qurux lagu manaystaay.
- Muddo aan yarayn baan
- Kugu soo maqnaayoo
- Ma ogtahay habeenadan
- Sida mayayga roobkoo
- Hadba maayad keenaad
- Ii muuqa taayoo oooo
- Muxibada kalgacalka
- Hadba soo mir kacayaa.....

Markay intaas maqashay ee weliba cod macaan oo debacsan uu ugu xareediyey ayey iyada oo iska jireysa inuu ka libin helo, dooneysana inay dareenkeeda muujiso, kaalinteedana qaato iyaduba kama cod yara oo weligoodba waa ku tartami jireen heesaha, caawase waa dhab u hees oo qof weliba dareenkiisa ayuu muujinayaa ayay ku dhufatay heestii ay hobollada caanka ah ee Xabiiba Xasan Tooxoow ku xareedin jirtey:

- Uurkiyo qalbiga
- Haddii aadan ku ool
- Ubax iyo jacayl
- Kulamaan sugeyn.

- Eelkaad wadnaha
- Ku abuurtey baan
- Abid iga go’ayn
- Naf ku aaminta
- Sida eyri dhaban
- Dayn weyday olol

- Aragiisaan kaan
- Ku il doogsadoow
- Ammaaniyo ducaba
- Ducaba ducaba
- Waad istaahishaa
- Inaan kuu tirshee
- Aayatiin ku waar.

- Amba maalintaan
- Ku arkaa Jacayl
- Unugyada jirkiyo
- Oofaha degee

- Adduunyada dhammaan

@somalibooks

- Inta ragee ku nool
- Waa adiga uun
- Kaan ka alkuntee
- Anna aawadaa
- Anfacadii ka go’ay.

- Quruxdii ifkiyo
- Ilays waa baryee
- Ammaantiyo ducada
- Ducada ducada
- Alla ha aqbalee
- Aan aqal galnee
- Ubax iga guddoon.

Markii qof weliba dareenkiisa muujiyey ee raynrayn iyo riyaaq lagu guddoomay gacalka cusub, qof welibana gaadhay libintii uu sugayey ayaa laysla meel dhigay in loo diyaar garoobo sidii gacmaha laysku qabsan lahaa, kalgacalkoodana looga mira dhalin lahaa, inta ay dugsiga ka dhammeynayaana ay iska dhursugaan.
Guhaad oo sheekadii sii wada ayaa yidhi “habeenkaasi wuxuu noo ahaa habeen barkhadeed, waxaa uuna ahaa habeenkii aannu gaadhnay go’aankii guusha”.
Waxaa aannu in door ah shuxshuxeynayba oo haasaawaha laba shubnaba waxaa aannu dhammeynay dugsigii, waxaan ka mid noqday ardeydii tababarka ciidanka labada gu’ ah loo direy, kaddib markii aan dhammeeyey ayaan doortey kuliyada ciidanka, waxaana laygu qaatay sarkaal xidigle ah, waxaa haddana sii watay hawlahaygii ciidanka ilaa aan noqday kabtan buuxa.
Ubaxna waxay ka mid noqotey ardeydii shaqada qaranka loo direy waxaana ugu dambeyn qaadatay wasaaradda maaliyada qaybta cashuuraha beriga oo ay isla magaaladayadii Baarcad waaxda ka hawlgasha.
Waxaa la gaadhay ammintii aan ballaney, waxaana arrintii la socodsiinay labada dhinac waalidiintii hooyaday Dhudi iyo adeeraday, iyaduna aabbaheed Carraale ayay u sheegtay, waana lagu taageeray aragtidayadii ahayd inaan qoys wada yagleelo.
Ubax iyo aniga waxaa aannu go’aansanay inaan marka hore is mehersano, kaddibna aan aqal galno.
Habeenkii meherkaygu dhacay ayaa Ubax gurigeeda naloogu sameeyey is tus saddex habeen ah, arrintaasna waxaa soo jeedisay hooyaday Dhudi maxaa yeelay waxay ahayd oori nin ciidan ah u dhaxday isla ciidanimada ku weyday, waxay ka codsatay reer Carraale in wax weliba dhici karaan ee layskaaya sii tuso, annagu arrintaas waxba kama aannu ogeyn ilaa naloo sheegay, waase u bogeyney oo laba bog oo isku baahi qaba ayaannu ahayn.
Maalintii aan ka soo noqday arooski iyo meherkii gaabnaa kuna soo noqday xeradii ciidanka ayaa waxaa aniga oo jooga xaruntaydii iyo rugtii maamulka ayaa ciidan dudaya iisoo galay, kaddibna waxaa laygu dul aqriyey warqad iyadoo lay faray.
Inaan dhammaan agabkaygii ciidanka wareejiyo iyo xog waraaqeedkii aan hayey laga

@somalibooks

bilaabo goortaasna aan ahay nin xidhan oo sugaya garsoorka ciidanka.
Maalintaas ayay ii bilaabatay kadeedka iyo dhibka aan maanta ku jiraa, waxaana ilaa hadda ogeyn meesha layga maagay.
Ragga isoo xidhay waxay ahaayeen rag aannu ka wada hawl galno xerada ciidanka waxaana madax u ahaa taliyihii guud ee Bile Dheere iyo wiilkii uu adeerka u ahaa ee Huruuse.
Waxaa kale oo isaguna sheegay inuu marag ka ahaa inaan fuliyey hawlgal ka dhan ah nabadgelyada dalka nin ku xigeen ii ahaa oo ila shaqeynayey iyo laba ka mid ah kuwii iigu dhawaa oo mid ahaa darawalkayga dhanka hawlgallada.
Ma garan karo wax igu jujuubi kara inaan dalkayga iyo dadkayga shisheeye u loogo, waxaanse hadda ahayn nin ku eedaysan wax aannu dooc iyo dareen midna ka haynin.
Oday Dirir oo arkay murugada iyo uur ku taallada ka muuqata ayaa isna markiisii bilaabay inuu u laab qaboojiyo, waxa uuna ku yidhi " Midho nin aan cunin ma qabtaan, balse waxaan kuu sheegayaa godka aynu ku jirno, maaha mid dhayal looga baxo adigoo dhinta ama baxsada maahine.
Guhaad sida uusan uga war haynin qoyskiisa iyo reerkoodi noloshoodana u moogyahay ayaa dhanka kale qoyskoodu u moog yihiin noloshiisa, wax ay hadba ku soo noqnoqdaan xeradii iyo taliskii uu ka tirsanaa, waxaa maalintii dambe lagu wargeliyey ninkaas iyo niman kale oo ciidanka ka mid ahaa, in kooxaha hubeysan ee duurka jooga ay dileen uuna geeriyooday.
Warbixintan dhiilada leh markii reerkoodu maqleen gaar ahaan hooyadii Dhudi walaalihii iyo xaaskiisi Ubax aad bay uga murugoodeen, Hooyo Dhudina waxa ay is tidhi " Halkii aabbihii ku baxay ayuu ku baxay" waxaana la dhigay gogoshiisa oo toddobaad la fadhiyey, xaaskiisiina ay asaay ku qaaday iyadoo asaydii sidana waxa ay ogaatay in ay uur leedahay.
Markay in ka badan gu iyo dheeraad ka soo wareegtay inta la la' yahay Guhaad, warkiisuna uu ciidankii dhex xulay waxa ayna shuxshuxdii gaadhay Taliye Caddaawe oo gobol kale jooga, arrintii ayuu u dhabbo galay waxa uuna rumeysan waayey inuu warkaasi dhab yahay.
Taliye Caddaawe wuxuu xog raadis u galay meel walba ilaa uu la xidhiidhay rag ay isku wanaagsanaayeen oo ka mid ahaa kooxaha hubeysan ee duurka ku jira(Jabhadda) balse waxa ay u sheegeen inuusan jirin sarkaal magacaas leh oo ay amminta la sheegayo qabteen ama dileen.
Arrinkani waxa ay ku sii abuurtey tuhun dheeraada taliye Caddaawe, waxa uuna dhacdada la socodsiiyey ciidanka ciidamada (Booliis meleteeriyo)iyo garsoorka ciidanka, waxaana loo oggolaaday inuu si madax bannaan u baadho arrinkaas awood buuxdana u haysto.
Wuxuu yimid magaalada Baarcad, wuxuu isku dayey in uu la kulmoqoyskii Reer Samatar, balse, markuu yimid gurigooda waxa loo sheegay inay halkan ka guureen oo magaalada Guryosamo u wareegeen ammin hore oo ku dhaw gu' iyo dheeraad.
Kaddibna wuxuu yimid xeradii, balse hore ayaa looga sii baarandegay in xogtaas la helo, dadkii ogaa arrinkana wixii lagu kalsoona maahine kuwii kale midba meelbaa laga tuurey.
Waayo ragga hawsha fuliyey marka laga reebo labada nin ee midna ku xigeenkiisa ahaa midna wadihiisa baabuurka maahine inta kale waxay ahaayeen koox isku duuban.
Taliye Caddaawe xog dhammeystiran ma helin, waxaana loo sheegay arrintii loo sheegay

@somalibooks

qoyskiisa, balse wuu ay ku filnaan weyday, waxa uuna bilaabay wareysi iyo xuuraansi dhan walba ah.
Waa nin ciidan ah kama uusan hordhicin ee wuxuu wareysi ugula dhaqaaqay taliye Bille Dheere iyo Huruuse, iyaguna waxay u jileen si qurux badan inay murugada iyo dhibaatada la qabaan qoyskii uu ka geeriyooday iyo isagaba.
Wuxuu ugu dambeyn si lama filaan ah ugu soo booqday hoygiisa Oday Caraale is bariidin iyo is wareysi dheer kaddib waxaa uu u sheegay inuu yahay, Taliyihii hore ee Guhaad, warka dhiillada lehna uu maqlay dhawaan, sidaa awgeed uu rabo inuu wax ka weydiiyo.
Carraale waxa u sheegay intii uu maqlay ama xog uu ka hayey iyo in ammin dheer laga warsugayey ugu dambeyna laga quustay oo gogoshiisa la dhigay, xaaskiisuna asaay u qaaday balse uma uusan sheegin iney uur u lahayd iyo in ay wax dhashay midna.
Markuu weydiiyey aaway Ubaxna wuxuu u sheegay in loo beddelay Madalweyn oo ay ka shaqeyso oo ay madax tahay meel sarena loo dhiibay, iyadana iyo isagana ay abaal weyn u galeen raggii ciidanka la ahaa ee Taliye Bille Dheere iyo Huruuse.
Markaasuu uag sheekeeyey dhacdadii murugada lahayd ee ku dhacday, in habeen ayaa iyagoo hurda ciidamo ordayaa albaabka soo jabsheen, argagax iyo anfariir kaddib Carraale guriga kala baxeen, laba toddobaad uu god madoow ku jirey laguna eedeyey arrin been abuur ah.
Taasoo ahayd in uu ka mid yahay ganacsatada taageerta kooxaha hubeysan, sidaa awgeed dowladdu soo jeedisay in aniga 80 nin oo kale toogasho nalagu casaaray, balse, isaga eebbe ninkuu dilaa dhinta ee waxaan ku badbaaday halgan iyo dedaal dheer oo ay ii galeen Bille dheere iyo Huruuse oo ahaa widaayadii Guhaad, sidaana uu ku badbaaday soo raggii kalena tiirka lagu geeyey asigana laygu soo daayey.
Sii dayntiisa waa dhab oo waxaa ka dambeeyey Huruuse iyo adeerkiisa Bille Dheere, waxaana ku barooratay Ubax, oo markii odaygeeda la waayey ilaa maalintaas uusan Huruuse ka qoob qaadin, isaga oo isaga dhiga mid naxariis u haya iyada iyo ilmaheeda.
Ubax markuu arkay inay kalsooni badan u haysona wuxuu ku daray aabbaheed raggii toogashada lagu jideeyey, kaddib markii ay garab weydiisatayna si kalsoonideedu usii laban laabanto, ayuu dedaal u muujiyey uu aabbaheed ku sii daynayo dilna uga baajinayo, Arrintani waa u suura gashay, reer Carraalena waxa ay u hayaan abaal aan la koobi karin, Ubaxna wuxuu ka helay kalsooni aad u badan.
Carraale waa war jire moog, waxaana laga dhaadhiciyey in la badbaadiyey, inkastoo ay jirtey in raggii kale dharaar cad la wada toogtay iyadoo ubadkoodi iyo ooriyahoodiiba ay goobjoog ka yihiin.
Dhacdadan dil wadareedka ah ee haldoorka lagu beegsanayo maaha mid ugub ah wax ay dhacday in badan, waana mida keentay in agoon fara badan ay u baxaan hawdka kana mid noqdaan kooxaha hubeysan ee ka soo horjeeda dowladda iyo ciidankeeda.
Waxaa waayahan socda guluf ka dhan ah qof kasta oo waxgarad ah lagana dareemo inuu saluug kaga jiro hannaanka iyo hawlaha ay wadaan kacaanku, qofkii arrimahaas lagu tuhmo ama laga dareemona waxaa meel u yaal dil ama xadhig, intaas loogama hadho ee waxaa loogu daraa in ubadkiisana hantida iyo guryaha lagala wareego.

@somalibooks

Arrintan ayaa fududeysay in dadweynihii doorbidaan ciidankii kale ee gadoodsanaa duurkana ku jiray cududna u noqdaan.
Maaha hawshan mid ay dowladdu u dhan tahay waxaase si qarsoodi ah hawshan u wada kooxo is gaashaanbuureystay oo gobollada dalka oodhan jooga,waxaa sidoo kale hoggaanka dalka loo gudbiyaa inay yihiin dadka la laynayo iyo kuwa la xidhayaaba dad ka soo horjeeda dowladnimada.
Haddaba Carraale ninkii naftiisa badbaadiyey ee Huruuse iyo Bille dheere wuxuu u arkaa barkhad cirka looga soo diray oo dhiigiisa ku hagoogtay waxa uuna u hayaa abaal weyn oo cid koobi kartaa aysan jirin
Taliye Caddaawe wuxuu ogaaday dhammaan arrimaha uu sheegaya inay dhab yihiin, waxa kale uu ka yaabay, hawlaha ay ciidamadu ka wadaan Baarcad iyo agagaarkeeda oo ah kuwo kala fogeynaya bulshada iyo ciidanka dowladda.
Halkaas waxaa uga soo baxday inay jiraan wax badan oo la qarinayo, balse, markan wax xoga oo dhammeystiran ma helin, isagoo weli tuhun weyni ku jiro ayuu dib uga noqday Baarcad.
Taliye Caddaawe haba yaraatee wuxuu waayey meel uu raadraac ka billaabo, kaddibna wuxuu go'aansaday inuu u cag dhigo oo tab kale adeegsado, aragyey inay awood badan ku leeyihiin Bille dheere iyo wiilka uu adeerka deegaankan iyo taliskan aysana jirin cid ku dhici karta inay wax ka sheegto.
Iyadoo xaalku sidaa u cakiran yahay oo aysan jirin cid xog buuxda ka haysa, geerida iyo nolosha Guhaad si dhab ahna u caddeyn karta ayaa waxaa maalmo kaddib kormeer iyo indha indheyn kedis ah ku tgeay Qabir dadeedkii uu ku xidhnaa Guhaad xubno saraakiil iyo madax sare ah oo nabadgelyada deegaankaas u xilsaarna uuna hoggaaminayo Taliye Shirwac.
Taliye Shirwac ayaa markuu dhammaan degel hawleedyada booqday oo warbixin mug leh la siiyey ayuu faray in bannaanka loo soo saaro, qabiranayaasha meesha ku xidhan, si uu u ogaado, noloshooda, gabboodfalyadooda iyo tiradoodaba.
Mar qudha ayaa laga dhex kacay oo meel laysugu keenay dhammaantood, waxaana la soo tubay daarada weyn ee Calanku ka lusho, qabir dadeedyada qololkeeda iyo degel hawleedkuna ku wareegsan yahay, dusha sarena aysan gaadheyn indhahaagu darbiga dheer ee ku wareegsan weliba taarka qodxaha leh iyo dhallooyinka jajaban lagu wareejiyey Afarta geesna qowlooyinka samaysan qoryona ay askartu sii saarantahay kaga dhisan yihiin.
Markii meel laysugu keenay ayaa la yeedhiyay Qabirane kasta magaciisa, tira sumadeedkiisa xilka ciidan ama hawsha dowladeed uu hayey iyo inta uu meesha ku jiray.
Mar qudha ayey dhegihiisu maqleen, Guhaad Samatar Digaale, hore ayuu u soo dhaqaaqey, markaasuuTaliye Shirwac keliya gartay labadiisa indhood iyo Afkiisa, waayo timahaa ku baxay, Gadhkaa ku baxay diif iyo dacdarro badana waa ka muuqataa.
Taliye Shirwac ayaa istaagay oo intuu anfariirey u qaadan waayey ninkuu tusaaleha ku bixin jirey in lagu daydo qaabka uu u egyahay taliye Shirwac ayaa weydiiyey horjoogihii qabirka maxaa ninkan lagu soo xidhay?
Duubane: Waa dhagarqabe la shaqeynayey kooxaha hubeysan iyo dabadhilifka xabashida.

@somalibooks

Shirwac: Waan gartay, ma haysaa waraaqaha laga qorey falka uu geystay iyo arrinka lagu soo xidhay?
Duubane: Haa, wuxuu markii faray xogyihiisa inuu soo saaro xaashiyaha eediisu ku dhantahay iyo xogta ku saabsan dhagarta uu maleegay ee loo soo gudbiyey.
Taliye Shirwac ayaa istaagay hadaljeedin dheerna galay, waxa uuna u sheegay in ay maanta kormeer yihiin, balse loo iman doono oo qof walba la weydiin doono, dibna loo wareysan doono, qofkii baadhitaankiisu soo dhammaadana la casaari doono, kuwii dhammeystayna la sii deyn doono, kuwa aan waxba ku caddaana la sii dayn doono.
Markuu hadalkii filashada ku abuurey dad quustay u jeediyey qabiranayaasha ayuu faray in maanta dhammaantood geel loo qalo, cunta wanaagsana la siiyo
Duubane: Farriintii la faray ayuu fulinteeda u dhaqaaqey.
Taliye Shirwac ayaa si gaar ah u codsaday in meel gooni ah loogu keeno Guhaad, kaddibna waa loo keenay, Taliye Shirwac waa raggii sida weyn u soo tabbobaray Guhaad waana nin aad u yaqaan habdhaqankiisa iyo qofnimadiisa weliba kalsooni weyn ku qabo.
Taliye Shirwac iyo Guhaad waxa ay ka wada qayb galeen hawlgalo badan, waxaana jirtey in hadda ka hor Shirwac oo ku go'doomey meel tuulo ah oo duulaan lama filaan ah ay ku soo qaaday xabashidu halako la geliyey oo ay gubeen magaaladii xabashidu, ciidankii joogay oo yaraa awgiisna la jebiyey.
Balse Taliye Shirwac iyo unug la socotay aad ula dagaallameen markii dambena ay galeen meel xurfad ah oo barkad laga qodayey oo weliba qabyo ah dhufeys adagna ka galeen.
Waxaa soo gaadhay qaylodhaanta taarka ay soo direen, kaddib Guhaad oo aan ka fogeyn ayaa urur uu wataa gurmad ugu yimid, si aan naxariis lahayna ula dagaallameen xabashidii, waxa ayna ka dhigeen, wax ay qabteen, wax ay dileen.
Maalintaas hal qudha kama uusan badbaadin ciidankii xabashida ee weerarka soo qaaday, waxaana ku dhacay jab ka weyn kii ay markii hore geysteen, inkastoo ay gubeen guryihii dadweynaha iyo degaanka, haddana iyagaa guuldaradu ku dambeysay.
Ciidankii uu hoggaaminayey Guhaad ayaa la wareegay dhammaan agabkii iyo hubkii ay wateena , sidaasna uu ku soo badbaadiyey Taliye Shirwac iyo ciidan toboneeyo ah oo qaar dhaawac yihiin oo ku jira godkii xorfada ahaa.
Taliye Shirwac weligiis ma uusan ilaawin maalintaas, waxa uuna mar walba majeeran jirey sida haaneedka leh iyo habsamida uu xilkiisa u guto, geesinnimada iyo daljeclida Guhaad.
Taliye Shirwac intaanay wada hadlin ee loo keenin wuxuu faray in la siiyo dhar cusub timahana laga jaro, qubeys iyo maydhashana loo oggolaado isla saacad gudaheedna lagu dhammeeyo intaas.
Waa farid ciidan oo baryo maahe, hore ayaa looga dhaqaaqey, waxaa loo keenay mar kale markaas Guhaad oo sidii hore ka duwan, balse diifta iyo darxumada ka muuqata oogadiisu maaha mid is dhallan rogeysa.Shirwac oo si wanaagsan u aqristay uguna bogtay arrimaha lagu eedeeyey naftiisuna ka biyo diiday ayaa wareysi ugu dhaqaaqey Guhaad iyo sida wax u dhaceen.
Guhaad ayaa dul iyo hoos maalintii la qabtay ilaa maalinta la joogo si hufan ugu dulmaray.
Taliye Shirwac ayaa weydiiyey "Ma jiraa qof aad is qabateen ama dagaal hoose idinka

@somalibooks

dhaxeeyey oo aad is leedahay shirqoolkan wuu kuu dhigi karaa?
Guhaad “Maya haddaanba ogahay miyaan ciil qabi lahaa”
Shirwac ayaa yidhi “ Arrintan dabagal ayaa ku sameynayaa, haddii eebbe oggolaadona waxaan la xidhiidhayaa Caddaawe, dhakhso ayaana kuugu soo noqonayaa, maanta wixii ka dambeeyana dil dambe iyo cadaadis dambe arki maysid, qaabka laguula dhaqmona sidii hore noqon maayo.
Ciidanka meeshan joogaa waa rag loo carbiyey cadaadiska iyo kadeedka dhagarqabayaasha, sida adigaba laguu carbiyey inaad colka shisheeyaha dalka uga dhawrto, iyagana waxaa loo carbiyey ciddii dhib lagu tuhmo inay dhibaan oo garaacaan, ogowna waa ciidan wixii la faro keliya samaynaya maahine ma jirto colaad adiga si gaar ah kaala dhaxaysa, aniga ayaana la hadlaya.
Taliye Shirwac waa nin hufan oo dal iyo dad jecel eebbana ku manaystay degani iyo garaad, waa ogyahay hawshu inay tahay mid ciidan, wuxuuse go’aansaday inuusan ku dhaqaaqin fal degdeg keena uuna si weyn u hubsado, halka sartu ka qudhunsan tahay.
Ninka nin ciidan ah sidaa u galay dadka iyo dalka oo dhan wanaag uma hayo ayuu nabdiga iska weydiiyey, sidaasoo kale wuu ogyahay inay jiraan kooxo gaashaanbuur ah oo olole ka dhan ah dalka iyo dadka wada, waxna aan ka duwanayn colka dibadda jira.
Taliye Shirwac maalintaas iyadoo raggii meesha ku xidhnaa dareen kale uu galay oo ay ogaadeen in ciidanku uusan wada xumeyn ayuu goor habeennimo ah ka baxay, waxa uuna si gaar ah ula dardaarmey Taliye Duubane una sheegay ninkani in uusan ahayn nin fudud ee uu xanaaneeyo si wanaagsana uu ula dhaqmo wuxuu u sheegay Guhaad inuu yahay geesi dal iyo dad jecel oo haysta “ Billad Geesi” uu isagu gacantiisa ugu xidhay.
Askartii iyo raggii la socday Taliye Shirwac ayaa weydiisay, hadduu sidaa ahaa laba gu’ ka horena uu jebiyey ciidankii shisheeyaha maxaa keenay inuu maanta dalka iyo dadka ku soo hoggaamiye col iyo guluf shisheeye, hubkii ciidankana u gacan geliyo kooxaha jabhadaha ah.
Taliye Shirwac ugama warcelin waayo waa arrin ciidan wuxuu faray inay dhar wanaagsan, bustayaal iyo cunto wanaagsan siiyeen, arrinkaasna uu yahay arrin ciidan oo aysan ku foggaan si weyna loo tixgeliyo.
Taliye Duubane waa qaatay talada iyo faridaba waxaana habeenkaas loo geeyey isaga iyo jaalkiisa laba Dhinacdhig go’yaal iyo barkimooyin waxaana durtaba billowday dhaqan iyo qaab ka duwan kii hore.
Intii uu u yimid taliye Shirwac waxaa ay ula dhaqmeen ciidankii ilaallada ka ahaa Qabir dadeedka si wanaagsan waxaa Guhaad ogaaday inuu ku jiro Qabir dadeedka God nacab(Xabsiga God nacab) ee duleedka Hoodaale.
Ammin ku dhawaad dhawr bilood kaddib ayaa waxaa kulmay Shirwac iyo Caddaawe, kaddib waxaa Caddaawe u caddaatay in la shirqooley waayo? Waxa hore loogu sheegay in uu geeriyooday oo weliba kooxaha hubeysani dileen, haddase inuu Qabir ku jiro oo weliba la dabin ayaa soo gaadhay.
Caddaawe wuxuu yaqaan oo ogyahay qofka uu yahay Guhaad, in aysan marnaba ka suuroobin inuu dalka iyo dadka hodadaamiyo, shisheeyena u jebiyo, waa nin u dhaartay

@somalibooks

ilaalin iyo jirida dalkiisa, mana aha suurtagal in xog iyo hub ciidanku leeyahay uu gudbiyo, arrintaasi waa mid uu si weyn uga biyo diiday, waxaana ku cataabay haddii taasi dhabbowdo qof dambe oo lagu kalsoonaan karaa ma jirto waase inaan ka jibo keena.
Caddaawe waa nin karmeed ad adag oo garasho dheer xeerka iyo dastuurkana ku dhegan waayo aragnimo ciidana lehe, markuu ogaaday sida wax u jiraan si aan loo dareemin mar kale oo hawshu qarsoodi u noqoto wuxuu arrinkii laba ka mid ah ciidankiisa oo u tababarnaa dhanka xogdoonka iyo dabagalka ciidanka baxsada iyo kuwa wax is dabamariya inay ninkaas hawshiisa soo ogaadaan.
Labadii askari waxa ay yimaadeen xeradii laga xidhay Guhaad si weyna waa u xuuraameen, waxayna qabteen labadii nine e maraga furay, iyaga oo ku eedeeyey inay dileen Guhaad oo sidaa awgeed loo xidhayo loona taxaabayo qabirka haddii aysan si dhab ah uga hadal dhacdada.
Labadii nin argagax iyo filan waa ayaa ku dhacay, waxaana u caddaatay inay gacan adag galeen, markay arkeen aqoonsiga iyo awoodda labada nin waxayna si dhab ah u qeexeen una sheegeen sidii wax u dhaceen ee ay ogaayeen iyaga oo sheegay in awoodna loo sheegtay balanqaadyona loo sameeyey sidaas awgeedna ay marag been ah ugu fureen.
Kaddib ma aysan xidhin waxa ayse u sheegeen inay afkooda haysaan waxay kale oo baadhitaan xooggan ku sameeyeen ragga kale ee ka tirsanaa ururkii uu taliyaha ka ahaa Guhaad.
Waxa ayna qof walba weydiiyeen Guhaad habdhaqankiisa iyo dhaqdhaqaaqiisa, si isku mid ah ayay dhammaantood uga warceliyeen, waxayna ku ammaaneen hufnaan, gobonnimo iyo nin dareen wanaagsan oo dalka iyo dadka jecel ayna u sinaayeen dhammaan ciidanka iyo dadweynahaba si wanaagsan ula dhaqmi jirey.
Raadgoob iyo dabagal dheer oo bil ku qaatay ayay ku sameeyeen Gaashaanle Huruuse.
Huruuse waxaa adeer u ahaa Bile Dheere oo ahaa Taliyaha qaybta gobolka Baarcad, Huruuse waa wiil xerada ku dhex dhashay kaddib dhimashadii aabbihiina waxaa hooyadii dumaaley adeerkii Bille Dheere, waxaa kaddib waxbarashadii dugsiga sare hore laga qorey ciidamo loo dirayey dalka dibadiisa, markuu soo noqdayna wuxuu qaatay lana siiyey heerka dhamme buuxa “Kabtan” maalmo markuu joogayna waxaa loo tolay gaashaan, mase jirin dedaal iyo hawlkarnimo uu la yimid kuna gaadhay heerka gaashaanle ee waxaa loogu tolay nin jeclaysi iyo eex waa nin isla weyn iyo is qaadqaad badan is kalana sarreeya dhammaan xubnaha kale ee taliska.
Huruuse waa nin qaabdarro oo dhami isugu tagtay, wuxuu maagana aan ciddina ka celin, waxaa loo sheegay in Huruuse gobolkan wuxuu doono ka sameeyo qof ka daba hadli kartaana aysan jirin.
Labadii nin ee dabagalka waday iyagoo raadraacaya oo weli daba socda warbixintii odayga Carraale lagu xidhay ayay soo ogaadeen in liiska ka yimid wasaaradda gaashaandhiga iyo raggii lagu eedeeyey inay gacansaar la lahaayeen xooggaga hubeysan uusan ku jirin Carraale ee ay iyagu ku dareen, waxa ayse garan waayeen waxa ay uga jeedeen xidhistiisa iyo haddana soo dayntiisa.
Raggaas oo magac ku lahaa deegaanka iyo gobolka una badnaa, hantilayaal iyo rag

@somalibooks

nabaddoona ah ayaa lagu darey isaga iyo laba kalese waa laga badbaadiyey, qaab ay ku badbaadeenna lama oga iyo qaab ay ku soo galeen.
Labadii nin waa Xaashi Sabriye iyo Oogle Macallin, waxay si weyn uga xumaadeen dhacdooyinka is hardinaya ee gobolka ka socda, waxay dib ugu laabteen taliye Caddaawe oo jooga gobolka Negaadi halkaasna kormeer hawleed ka waday.
Xaashi iyo Oogle waxa ay la wadaageen xogtii ay soo uruursheen iyo sida xaalku yahay, taliye Caddaawe waaga ayaa ku baryey marka loo sheegay waxaa halkaas markiiba uga soo baxday in Guhaad gacan nacab galay oo la xadhigiisa iyo shirqoolkiisa ujeed weyni ka dambeyso dhagar uusana gelina dusha loo saaray, balse xaalku ma fududa oo taliye Caddaawe waa ogyahay in uusan u dhawaan Karin Bile dheere oo ka idaad haysta golaha sare iyo madaxtooyada.
Haddaba si uu xog dhab ah u helo wuxuu aaday gobolka Baarcad si uu u wareysto Carraale Haybe oo ah Ubax aabbaheed si uu u arko Ubax una weydiiyo inay wax uun ka ogtahay arrinkan, haddana waxaa usoo baxday in reerkaas laga dhaadhiciyey inuu dhintey, haddana isaga oo aan arag Guhaad uusan u sheegi karin noloshiisa.
Taliye Caddaawe waxaa u taal hawl laba afleey ah oo ah inuu qabirka ka soo saaro si kasta ha noqotee Guhaad iyo in noloshiisa uu caddeeyo oo reerkoodi iyo xaaskiisaba u sheego.
Waxa mar kale si war ma qabto magaaladii u wada yimid taliye Caddaawe iyo labadiisi widaay ee xogdoonka uu hore ugu soo direy, markana waa inay helaan caddeymo muujinaya in arrintan ay maleegeen Bille Dheere iyo Huruuse.
Arrinta la yaabka leh ayaa ahayd markii ay magaaladii ku soo noqdeen ee ay tageen ayaa xogtii ugu horreysay loo sheegay waxa ay noqotey in gabadhii Ubax ahayd Huruuse u geed fadhiistay, loona mehriyey habeen hore, gurigiina reer Carraalena lagu jiro aroos iyo damaashaad loogu dabaaldegayo reerka cusub.
Arrintan ayaa ciil iyo murugo kale sii gelisay, waxaana markan caddaatay hawshu inay siday moodayeen ee ahayd beegsi qofeed ama arrimo ismaandhaaf ciidan ka qoto dheertahay oo ay tahay dhaxal wareejin.Waxa haddaba is weydiinta mudan ayaa ah, Ubax ma qayb bay ka ahayd shirqoolka mise oday Carraale ayaa ka ahaa, sidee loo ogaanayaa inaysan lug ku lahayn iyo in kale?
Arrimahani waa kuwa sii milqiyey baadhitaanki waxaase cad in shirqoolku ahaa mid lagu dhaafinayey xaaskiisa oo Huruuse iyo adeerkiis maleegeen, lamase hayo waddo cad oo lagu beegsan karo iyo marag xog ogaal ah.
Waxa ay adeegsadeen markaan hab kale oo dhammaan goobihii ay tegi jireen iyo dadkay ku xidhnaayeen ayay tabaas iyo dabagal ku sameeyeen, Cosob gabadh qaadka iibin jirtey si qarsoodi ah oo ay gurigeeda ku shiri jireen kuna qayili jireen si weyna xogteeda u haysa ayey u gaatameen waxa ayna ku qabteen iyada oo qaad u yimid, qaadku oo markaas ahaa mid ka reebtoon dalka, waxaana qofka lagu qabto gurigiisa iyo hantidiisaba la wareegaysay dowladda, iyagu waxba kama gelin qaadka, waxa ayse rabaan inay Cosob ku gilgilaan si ay xog iyo warbixin ay ka duulaan ugu helaan.
Cosob wey ogtahay inay rag adag ku daaban tahay, balse, markii la tusay aqoonsiga oo ahaa kooxda dabagalka iyo xog doonta ayay baqatay, waxaana loo sheegay in cid

badbaadinaysaa aysan jirin.Cosob maaha gabadh gabatee waxay la gashay heshiis inay lacag badan siinayso ayna sii daayaan, arrinkani waa midka ay heshiiska kula ahayd kooxda gaashaanbuurta, balse kuwani maaha kuwa lacag iyo hanti raba waa niman hufan oo ka xalan wax is dabamarin iyo tagrifal awoodeed.

Waxaa loo sheegay in arrinkaasi uusan agtooda ka soconeyn, balse, waxaa lagula gorgortamay inay ku badbaadayso haddii ragga ay doonayaan ay xog dhammeystiran ka siiso ama ay ka hadliso, xogna ka duubto Huruuse sida uu ku helay iyo sida uu ku hantay Ubax.

Cosob ayaa ka biyo diiday inay xog ka duubto waayo? way ogtahay waxa ay mudanayso haddii ay hawshaas fuliso, bale waxay siisay xog aysan dhaadanayn markii hore oo ahayd, in Huruuse weligiisba gabadhaa maagana, waagay wada socdeen Guhaadna uu dhawr jeer isku dayey inuu sheeko la wadaago oo iyada lafteeda u dirsaday balse aysans u suuragelin la kulankeeda iska daa wada hadalkeede.Sidaa awgeed uusan ahayn jacaylka Huruuse mid haatan bilowday intii Guhaad baxay ee uu hore ugu jirey.

Halkaasna waxaa u caddaatay in markii hore ay jirtey filasho ah inuu maalin uu heli doono, balse markii lagu xidhay guhaad ee ay marwadiisa noqotey uusan jirin xal aan ahayn in Guhaad lays dhaafiyo ifkana laga qariyo.

Taliye Caddaawe iyo labadiisi widaay waxaa u caddaatay in hawshan si wadajir ah loo qabtay, balse, weli waxa ay moogan yihiin in qoysku qof ka mid ahi wax la waday iyo in kale.

Taliye Caddaawe iyo labadiisi ciidanba waxay si toos ah u abbaareen Taliye Bille Dheere iyo Huruuse, waxaana loo geeyey dhambaal caddeynaya in baadhitaankii la soo celiyey, hawshiina la oggaaday oo ninkaasi uusan dhiman, cidda xidhay iyo arrinka loo xidhayna uu garsoorka ciidanku oggolaaday in la baadho.

Waxay Huruuse iyo Bille Dheere la yaab ku noqotey sida ay ku ogaadeen Caddaawe iyo xertiisu ninka ay godka madoow ku rideen waxa ayna ka shalaayeen, maxaad ugu dari weydeen raggii la laayey ama si gooni ah aad ugu dili weydeen idinkoo shirqoolkana caddeyn uga dhigaya, hadda iyaga ay ku tooman tahay, si kasta oo ay ugu daaban yihiin rag sare oo awood badan, haddana gaashaanbuurtu ma jecla in la ogaado miliqooda iyo dhibta ay maleegayaan, waxaa soo foodsaartay arrin culus oo u baahan si looga dabaasho.

Waxaana loo ballamey in maalinta sabtida lays arko maxaa yeelay Khamiis ayaa la joogay jimcena cidna ma shaqeyso, iyada oo la faray in ay keenaan dhammaan caddeymihii iyo maragii hawshaas ogaa, qof qofna loo wareysan doono, garsoorkii hawsha galayna la gole keeno, arrintani waa mid ciidan awood kasta ha lahaadeen, balse markan kuma tuman karaan si badheedh ah, waana lama huraan inay fulliyaan waayo dhambaalka ay wataan maaha mid ay ka hor iman karaan ama baajin karaan, “farid ciidan waa yeelmo ninkii diidana isagaa u qoolan”.

Waxaa la gaadhay maalinnimadii sabtida ahayd, waxaanna laysugu yimid xarunta talis dhammaan taliska ciidanka xoogga ee Baarcad taliyayaasha iyo madaxdiisa oodhan, Garsoorka ciidanka ee riday casaartii iyo qabbirkii lagu xidhay Guhaad, dadkii goobjoogga ahaa markii maragga beenta ahaa lagu furayey, maragyadii beenta furay kuwo ciidan ah iyo kuwa dadweyne ah, taliye Caddaawe iyo labadiisa jaal.

@somalibooks

@somalibooks

Meesha waa goobta wareysiga iyo wada hadalka ee ciidanka waxaa yaalla kuraas hal dhinac u badan oo labaateemo gaareysa, dhinaca kalena meel ka soo horjeedda waxaa fadhiya, taliye Caddaawe iyo labadiisi jaal Xaashi iyo Oogle, meel kale oo barbarkooda ahna waxaa fadhiya laba nin oo garsoorkii hore ka mid yahay, dhanka kalena waxaa fadhiya, Afartii maraggaa laga dhigay.

Waxaa warbixintii bilaabay Xaashi oo si wanaagsan u qaadaa dhigay inta meerto uu soo maray baadhitaankan iyo caddeymo in la hayo inkasta oo uusan muujin sheeginna caddeymaha, wuxuu kale oo ku dul aqriyey xaashidii faridda ahayd in dib loo furo galkan gareed ee baadhitaanka ah.

Intaas markuu dhammeeyey ayaa waxaa is taagay Oogle oo si weyn u lafa guray, xeerarka u yaal ciidanka iyo garsoorkiisa, ganaaxyada iyo leh dil iyo xadhig ee uu mudan karo qofka baalmara, waxa uuna sheegay in qofkii qiraal keena arrintiisu ka fududaanayso tan kale.

Halkaa markii laga gudbay ayaa waxaa kursi meel gees ah yaallay looga yeedhay Huruuse, si wax looga weydiiyo, eedaymaha lagu xidhay laguna qabbirey Guhaad.

Huruuse iyo Bile dheere hore ayay u heshiiyeen inay marka hore indho saab ku dayaan oo ay eedo ku dhoobaan, haddiise caddeymo la keeno ama lagu soo oogo inay si badheedh ah isaga diidaan awooddoodana adeegsadaan.

Huruusena waa nin hawsha si weyn ula socdaye, wuxuu u sheegay in ninkaas gacan bir ah lagu qabtay oo halis uu ku ahaa ciidanka iyo nabadgelyada dadweynahaba.

Taliye Caddaawe ayaa wuxuu si deggan u weydiiyey intee in le'eg ayuu waday hawsha lagu soo eedeeyey Guhaad? Sideese lagu helay xogta ah inuu hub gudbinayo yaa soo sheegay? Yaase soo ogaaday? Hubku haddduuba yahay hubkii ciidankiisa iyo ururkiisa ku qornaa, side loo caddeeyey inuu cid kale u wado? goob joog ma ahaa, markii baabuurka hubku saarnaa kaymaha duleedka magaalada lagu qabtay? Aawaye ciidankii kale ee hubka la gudbinayey? inuu hawshiisa ciidan watay iyo inuu hub gudbinayey sidee lagu ogaaday, maxaa yeelay meesha uu joogay waa duleedka magaalada uu ka hawlgalo ee ma ahayn soohdin dalka ka baxsan?

Huruuse ayaa inta gubtay oo isla kacay u dulqaadan waayey weydiimahan dhimbilaha ka kulul markaasuu yidhi: "Oo ma waxaad marmarsiinyo u raadinaysaa nin Mahbar ah, maxay tahay caddeynta aad u baahan tahay saw ma ogid ninkaasu inuu yahay nin reer Dacar ah reer Dacarna ay maanta yihiin dad ka soo horjeeda dowladda iyo nabadgelyada dalka?"

Taliye Caddaawe oo gartay ninkani in uusan hayn wax caddeyn ah iyo waddo lagu xidhi karo nin ciidan ah ayaa yidhi: "Adiga iyo isaga midna reerkiisa ma aqaan ee waxaan aqaana inaad tihiin laba nin oo ciidanka ka mid ah, hawlaha kale iyo godobaha beelihiina ka dhaxeeya waxba kama gelin ciidanka iyo xeerarkiisa.


Huruuse ayaa isagoo afka ka xumbaynayaa ka baxay iridka, isagoo aan dheg jalaq u siin farid la siiyey oo ahayd inuu digtoonaado, dhegaystana hadalka taliyaha, waxaa markiiba ka daba istaagay, Xaashi iyo Oogle oo faray ciidankii meesha joogay in la qabto.

Durbadiiba waxaa ka daba istaagay Taliye Bile Dheere oo afka hore fadhiyey, waa uuna ka dhego adeygay, kaddib ayuu yidhi " Waa dhallinyaro ee waan ka daba tagayaa ee i sug"

Taliye Caddaawe warkaasi kuma socone wuxuu ugu warceliyey" Ciidanku dhallinyaro iyo

@somalibooks

xigaalo ma yaqaan ee waa inuu ku soo noqdaa fadhiga, weydiimahana iiga warceliyaa haddii kale waxaan farayaa in ciidanku xidhaan weliba (Farid diid) ayaa lagu qaadayaa ganaaxana waxaa hadda ka dhawaajinaya Garsoorka oo horteyda fadhiya.
Bile Dheere ayaa isaga oo badbaadinaya wiilkiisa dharbaaxo labada indhood ku gooyey farayna inuu dhegaysto Taliyaha, gutana xilka qaran ee saaran.Bile Dheere wuxuu arkay inaan laga lug baxayn Caddaawe, haddaan loo helin caddeymo buuxa.
Huruuse ayaa farta ku fiiqay laba oday oo meesha fadhiyey oo yidhi: Waa kuwaas raggii hawsha la waday, Labadaas nin waa kuwii isku xidhayey isaga iyo kooxaha hubeysan ee shisheeyuhu ku adeegto, labada kalena midna waa wadihiisa midna waa xoghayntiisa waana niman xog ogaal u ahaa arrinka.
Arrinkii ayuu dhegaystay Taliye Caddaawe kaddib wuxuu arkay labada nin ee kale in arrinta loo soo meeriyey ee aysan waxba ka aqoonin Guhaad. Waxa uuna labadoodi si kala duwan u weydiiyey dhawr arrimood oo ku saabsan Guhaad.
Taliye Caddaawe ayaa weydiiyey ninkii koowaad ee sheegtay inuu hawsha isku xidhka ka dambeeyey.
Taliye Caddaawe: Guhaad immisa Jeer baad kulanteen? Maxaadse nooga tilmaami kartaa qaabka uu egyahay iyo arrimaha ku saabsan balwaddiisa?
Maraggi Koowaad oo aan weligiis arag Guhaad ayaa bixiyey tilmaam mutuhis ah ileyn muuqaalkiisa weligiis ma arage: “ Guhaad wuxuu ahaa nin dhallinyaro ah oo da’ 30maad ku jira oo dhiig furan, nin ciidan ah oo jidhkiisu dhisan yahay xooggan, intaan isla joognanyna sigaar buu cabayey oo balwad aan taas ahayn kuma arag.
Taliye Caddaawe ayaa weydiiyey, maraggii labaad ma aragtay ama xasuusataa astaan gaar ah oo ninkaasi lahaa?
Maragii Labaad ayaa isna hinqaday oo yidhi: Nin qurxaan ah ayuu ahaa balse inta badan habeen ayaan kulmi jirnay oo ma caddeyn karo astaamo gaar ah.
Taliye Caddaawe iyo jaalkiisa hore ayay ula kulmeen labadii marag ee la yidhi, been farriima waxa ayna ka hayaan cod iyo qoraal ay ka qaadeen suul iyo summad, waxa ayna shideen oo shirka hortiisa ka caddeeyeen codkoodi iyo qoraalladii ay suulka saareen, sidaas ayaana maraggoodi ku burey.



Taliye Caddaawe ayaa weydiiyey garsoorka “ Garsoore sidee ayaad u aragtaa tilmaanta nimankani ka bixiyeen Guhaad? Ma ku raacsan tahay?
Garsoorihii oo Khalkhal ku dhacay aadna uga baqdin qaba arrinka dib ugu soo noqday oo hore looga ballan qaaday in uusan soo noqonayn, ayaa si kalsooni ah u yidhi “ Maya kuma raacsani, mana aha tilmaamtaasi mid Guhaad leeyahay?
Kaddib taliye Caddaawe ayaa ku yidhi “

@somalibooks

Waxaa noo cad in aydaan la kulmin Guhaad weligiina arag, marka marag beenaadka xeerkaas ayuu ciidanku ka qabaa, Garsoorkiina waa fadhiya, waxaadse ku badbaadi kartaan, haddii aad tihiin dadweyne inaad runta sheegtaan maxaa yeelay ciidan ma tihide, haddii ay jiraan arrimo idinku sandulleynaya ama cabsi aad qabtaan in aad marag been ah furtaan xeerka dalka iyo ciidanka ayaa nabad gelyadiisa dusha u ridanaya.

Labadii nin oo markay maqleen hadalka Garsooraha oo hore loogu sheegay inuu wax ka ogyahay iyo labadii marag ee ciidanka ahaa oo codkoodii iyo qoraalkii beeninta ahaa la gole keenay, ayaa waxa ay qireenn aysan weligood arag, ciidanna waxba u kala wareejin, lacagna la siiyey, dad danyar ah oo hunguri galayna ay yihiin, gacan dadnimo iyo naxariisna loo fidiyo.

Markii sidaa la wada maqlay ayaa madaxdii ciidanka iyo taliyayaashii kale ee goobta fadhiyey guux iyo xamxam badani gashay waxaana aad looga yaabay orodka Huruuse iyo maragga beenta ah.

Taliye Caddaawe ayaa istaagay oo una mahadceliyey ka soo qaybgelayaasha, Taliye Bile dheere iyo Garsooraha una sheegay in maanta halkaas ay gartu ku xidhan tahay, laba maalmood kaddibna laysu iman doono, oo ku beegan maalinta talaadada ah. Garsooruhu waa u hoggaansamey waana yeelay arrinka maxaa yeelay isaga ayaa hadda naftiisa u baqay, dhambaalka ka yimid garsoorka ka sarreeya,caddeyn la'aanta Huruuse iyo maraga beenta ah ayaa argagax geliyey.

Taliye Caddaawe oo halkaas ku muujiyey ciidanka dhexdiisa in la shirqooley Guhaad oo magaciisa la uskageeyey, lagana dhigay dhagarqabe oo loo maleegay mallas iyo dabin ayaa yidhi " Baadhitaanka iyo caddeymaha hadhay maalinta xigtaan ayaan idinla wadaageynaa, ciddii ka dambeysayna xeerka dalka iyo ciidanka ayaa arrinkooda lagu qaadaya.

Taliye Bille dheere iyo Huruuse ayaa arkay arrintu aysan fududeyn, ninkanina yahay nin adag oo aan ka hadhayn ciidankii oo dhamina dhankiisa maray, isagoo u muujiyey waddo ay ku raaci karaan oo muujinaysa hufnaanta iyo kala dambeynta.

Taliye Bile dheere wuu dareemay in lagu soo maqan yahay oo aysan hawshu halkaas ku dhammaan, nin loo dhawaan karona maaha Taliye Caddaawe oo ma hawlyara, marka wuxuu isku dayey inuu raadiyo qaab uu ku baajiyo arrinkiisa, wuxuuna la hadlay, taliska guud ee wasaaradda gaashaandhiga, isaga rag ay isku xulufo ahaayeen kana mideysnaayeen, dhibaataynta dadweynaha iyo beegsiga deegaamo gaar ah u sheegay in ninkaasi hawshiisa laf dhuun gashay ku yahay baadhitaan adagna uu wado uuna u baahan yahay in laga hor wareejiyo oo hawl kale loo diro.

Arrintaas wuu sii hordegay taliye Caddaawe, waxa uuna wasaaradda Gaashaandhiga ka haystaa dhambaal awood farid ah, tirakoobka ciidanka iyo diiwaangelinta wixii dhintay, gaboodfalyada dhacay iyo kuwa baxsaday, arrintan oo ah ciidanka ciidankiisa(Booliis Meleteri) oo adag sida laysu hortaago ama ammin qaadanaysa baajinta arrinkaas.

Waxaa soo dhacay Taar laga doonayo in Taliye Caddaawe tago xeryaha gobolka Hareeriley oo arrimo aan looga maarmayn halkaas looga rabo, balse Taliye Caddaawe waa ka cudurdaartay isagoo sheegay in hawl ka culus uu hayo haddii ay rabaanna in qayb ka mid ah hawlwadeennadiisa u diran karaan arrimaha Hareeriley.

Iyadoo murankaasi jiro ayaa Garsoorihii ugu yimid guriga taliye Caddaawe isaga oo anfariirsan, waxa uuna u sheegay in xaalkiisu xun yahay, laguna sanduleeyey inuu Guhaad ku eedeeyo inuu dhagarqabe yahay, haddii uusan falinna in wixii uu hore falkiyey oo dhan la soo saarayo, isaga iyo qoyskiisana la beegsan doono, weliba waxaa laygu hanjabay buu yidhi " In anigoo arkaya gabdhahayga laygu hor kufsan doono" intaas kaddib waxaa i soo wacay nin ka mid ah, madaxda sare iina sheegay in aan qoro dhambaal aad magaalada uga baxayso.

Taliye Caddaawe ayaa yaabay, balse waxa uu u ballan qaaday in isaga iyo qoyskiisaba u badbaadinayo, arrinta dooddaa iyo gartana dib loo dhigayo oo aysan talaadada dhacayn.

Isla markiiba wuxuu la hadlay talis aan ka fogeyn oo ciidan waxaana si arrinkan looga kaalmeeyo, waxaana u yimid rag ka tirsan ciidanka ciidankooda(Booliis Meleteri) waxa ayna qaadeen goor habeennimo qoyskii Garsoore Siidoow

Maalinnimadii talaadada laysuma iman, waxaana ay mar dambe ku baraarugeen in Garsoore Siidoow aysan qoyskiisu joogin, isagiina aan meel lagu ogeyn, arrintan ayaa talo sii murjisay, waxaana galay werwer cusub Taliye Bile Dheere iyo Huruusi, waxa ayna ka baqdin qabaan in arrinkani bannaanka u baxo, kaddibna warbaahinta cara edeg gaadho, arrintuna noqoto mid daaha ka qaada gabboodfalka baahsan ee kooxda gaashaanbuurtu waddo.

Waxa ay la xidhiidheen nin ka mid ah, golaha sare si uu xal u helo, balse, markaan arrinku waa dhaafay mara guudkeed, waxaa toos loola soo hadlay, Taliye Caddaawe loona sheegay inuu faraha kala baxo, hawlaha uu wado ee ka dhan ka ah arrimaha ciidanka, haddaanu joojina inuu isagu ku guban doono, dabka uu ku ciyaarayo.

Taliye Caddaawe markan isaga ayaa godkiisa biyo ugu soo galeen, waayo ninka la hadlay waa nin awood u leh inuu berri xilka ka qaado, kaddibna hawlgal ka dhigo ama qabbir u dhaadhiciyo iyadoon waxba loogu marmarsiinyoon. Waa ninka ugu sarreeya ciidanka oodhan isagana ay hoos yimaadaan talis walbaa, waa nin aan madaxweynaha maahine nin kale waxba ka dhegaysan.

Taliye Caddaawe ayaa ciil la joogi waayey cadho awgeedna indhuhu guduuteen, waxa uuna is weydiinayaa, maxaa keenay in ciidankii loo tabbobaray loona diyaariyey inay bulshada ilaaliyaan, nacabka iyo shisheeyaha ka jiraan inay sidii gumaystaha ula dhaqmaan oo ilaa heerkaa dadka cadaadis la saaro.

Wuxuu uu dareenkiisa ka helay inuu ogyahay hal dhacdo, balse, ay jiraan kumanyaal ka daran oo dadweynaha iyo shaqaalaha kale lagu hayo.Faridi maaha baryo iyo codsi ee waxaa lagu jujuubay Taliye Caddaawe inuu faraha kala baxo hawsha Guhaad iyo Garsoore Siidoow, saddex maalmood gudahoodana uu ku wareejyo wixii caddeymo ah ee uu hayo, Bile Dheere.

@somalibooks

Maktabada telegramka @somalibooks

@somalibooks

